DASTUURKA

DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

2009

بـــسـم الـلـه الـرحـمـن الـرحـيـم

Hordhac

03/06/2009

Sannadku markuu ahaa 1998dii Puntland waxaa lagu asaasay wada-tashi iyo is-afgarad gobollo ku bahoobay in ay dhistaan maamul dawladeed oo iyaga u gaar ah,

Taasi waxay ka dhalatay markii muddo siddeed sanadood ah ay soomaalidu ku guulaysan weyday in ay ku heshiiyaan dhisme Dawlad qaran oo loo dhanyahay,waxaa hadaba dadka puntland garwaaqsadeen in aysan intaa ka badan dawlad la'aan ahaan Karin, waxayna shirweynihii Dastuuriga ahaa ee 1998dii ku go'aansadeen dhismaha dawladda puntland oo ka mid noqon doonta dawladda qaran ee Soomaaliyeed oo federaal ah.

Xilligaas, shirweynihii lagu dhisay dawladda puntland waxaa lagu ansixiyey axdi ku meel gaar ah, waxaana badelay Dastuur ku meel gaar ah, oo aan afti loo qaadin, sidii horay loogu ballamay waxayna ahayd in aftidu dhacdo ka hor 2004tii.

Tan iyo 2005tii waxaa lagu hamiyayey in Dastuurka puntland dib loogu noqdo, si uu u noqdo mid la saanqaada waayaha cusub ee dalka, hase yeeshee duruufo jiray awgood taasi ma meel marin, waxaa kale oo Dastuurka looga baahnaa in lagu qeexo in dalka laga hirgeliyo nidaamka caalamiga ah ee axsaabta badan, si dadka fursad loogu siiyo in ay toos uga qayb-qaataan doorashada una soo xushaan cidda dawladnimada u matali lahayd.

Haddaba,Dastuurkan cusub waxaa loo dhigay inuu xeer dawladeed u noqdo dadka puntland,waxaana saldhig u ah shareecada islaamka, isla-markaasna wuxuu hagayaa dawladnimada,islashaqeynta iyo kala-dambaynta hay'adaha dawliga ah ee dalka.

Waxaa xusid mudan in Dastuurkani saameyn ku yeelanayo noolasha qof kasta oo puntland ah, sababta oo ah qaran ma la'aan karo xeer ay shacabku ku kala danbeeyaan oo qeexaya xuquuqdooda iyo

waajibaadkooda ummaddeed, si ay u higsadaan horumar bulsho iyo mid dhaqaale.

Dastuurkan waxa uu si kooban u jihaynayaa, xeerarka lagu nidaaminayo hawlaha tirada badan ee hay'adaha adeegga dawladdu ku howlagayaan, sidaa darteed, waxaa Dastuurkani u adeegayaa maslaxadda muwaadiniinta puntland oo dhan.

Kol hadduu Dastuurkani yahay dokumenti guud ee nidaaminaya qaabka dawladnimo ee puntland wuxuu kaloo saamayn ku yeelanayaa dadka ka tirsan qaybaha kale ee jamhuuriyada federaalka ee Soomaaliya ee musraqbalka,Puntland waxay go'aansatay in qayb ka noqoto nidaam dawladnimo oo waxna la kala leeyahay, waxna la wadaago, sida ku qeexan qodobadda Dastuurka ee khuseeya israaca dalka jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee federaalka ah.

Waxaa la rajaynayaa qof kasta oo puntland ah in uu barto Dastuurkan si uu wax uga ogaado ahmiyadda uu u leeyahay higsashada siyaasadeed ee ummaddeenu degsatay

Guddoomiyaha Golaha Wakiilllada
Md:- C/rashiid Maxamed Xirsi

Madaxweynaha Dawladda Puntland
Dr:- C/raxmaan Maxamed Maxamuud

بـــسـم الـلـه الـرحـمـن الـرحـيـم

Madaxa I

MABAADIIDA AASAASIGA AH EE PUNTLAND

QAYBTA 1aad
ASTAAMAHA AASAASIGA AH

Qodobka 1aad
MAGACA IYO HIMILADA

1. Magaca Dawladdu waa Dawladda Puntland ee Soomaaliya.

2. Himilada Dawladda Puntland waa taabbagelinta nidaam dawladeed oo ku dhisan wadatashi, sinnaan iyo caddaalad bulsho oo waafaqsan Shareecada Islaamka, una horseedi karta dadkeeda nabad iyo xasillooni waarta iyo horumar dhinac walba ah oo ku jihaysan kor u qaadidda heerka nololeed ee dhammaan muwaadiniinta Puntland iyo ka qayb-qaadashada in himilooyinkaas ay gaaraan dhammaan dadka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad
SARRAYNTA SHARCIGA

1. Sharciga ayaa ka sarreeya qof kasta.

2. Dhammaan hay'adaha Dawladda iyo dadweynuhuba waxay u hoggaansamayaan sharciga

Qodobka 3aad
MABAADI'DA ASAASIGA AH

1. Awoodda oo dhan ***EEBBE ka sokow*** waxaa iska leh dadweynaha, waxayna u idmanayaan mas'uuliyiin ay u xilsaartaan si sharciga waafaqsan. Mas'uuliyiinta dalku waa adeegayaal dadweyne, xilkoodana waxay u gudan karaan oo kaliya sida uu sharcigu farayo ama uu bannaynayo.

2. Ma jiri karo qof, koox ama qayb ka mid ah bulshada oo awoodda dawladnimo u adeegsan ***kara*** si gaar ***ah***.

3. ***Hannaaka*** siyaasadeed ee Dawladda Puntland wuxuu ku saleysan yahay mabaadiida ***hogaamineed ee*** :

   (b) Shareecada Islaamka;

   (t)***Is-xukunka*** Dadweynaha

   (j) Maamul-wanaagga;

(x) Wada-tashiga;

(kh) Horumarinta hiddaha iyo dhaqanka suubban ***ee Soomaaliyeed***

(d) ***Danta guud oo laga hormariyo tan gaarka ah.***

(r) ***Tartanka Xisbiyada Badan iyo xukunka oo lagu baahiyo dalka oo dhan.***

4. Puntland waxay aqoonsan tahay ***mabaadiida*** aayo-ka-talinta ummadaha adduunka.

5. Puntland waxay taageereysaa in khilaafaadka caalamiga ah, kuwa cusub iyo kuwii hore u jireyba, lagu dhammeeyo wada hadal iyo hab nabadeed.

Qodobka 4aad
HANNAANKA XUKUNKA

1. Dawladda Puntland waa qayb ka mid ah Soomaaliya, xil ayaana ka saaran hirgelinta Dawlad Soomaaliyeed oo ku dhisan habka Federaaliga ah.

2. Awoodaha Dawladda Puntland ay ku wareejin doonto dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo xuquuqaha ay yeelanayso Puntland, waxa ay ku imaanayaan wada xaajood iyo heshiis dhexmara Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland, ***taas oo*** lagu qeexi doono Dastuurka Federaalka ***iyo kan Dawladda Puntland***

3. Inta laga dhammaystirayo Dastuur federaal ah oo Puntland ***wax ka*** ansixisay ***ka dibna*** afti dadweyne lagu meelmariyey, Puntland waxay lahaaneysaa awood Dawlad madaxbannaan.

4. Dawladda Puntland waxaa u bannaanaanaysa in ay dib u eegto arrimaha ku xusan faqradaha 1aad, 2aad iyo 3aad ee isla qodobkan, haddii:

   (b) Soomaalidu ku heshiin weydo qaab-dhismeed dawladeed oo aan ka hooseyn nidaamka Federaaliga ah.

   (t) Ay daba dheeraadaan daganaansho la'aanta iyo dagaallada ka aloosan qaybaha kale ee Soomaaliya.

5. Mowqifka cusub ee Xukuumadda Puntland ka qaadato arrimahaas waxaa cod saddex meelood laba (2/3) ku ansixinaya Golaha Wakiillada, ka dibna waxaa loo qaadayaa afti, sida ku cad qodobka 139-aad faqradiisa 1aad ee Dastuurkan.

Qodobka 5aad
DADKA

1. Dadka Dawladda Puntland waa dadka ***u dhashay*** Puntland ***iyo qof kasta oo Puntlandnimada ku helay qaab sharci ah.***

2. Xeer u gaar ah ayaa qeexi doona Puntlandnimada, xaqa degenaanshada iyo kasbashada meeqaanka Puntlandnimada

Qodobka 6aad
TIROKOOBKA

1. Dadweynaha Punltland tobankii sanaba mar baa la tirokoobayaa.

2. ***Xeer gaar*** ah ayaa tilmaami doona Wakhtiga iyo habraaca tirakoobka.

Qodobka 7aad
DHULKA IYO SOOHDIMAHA

1. Dhulka Puntland waxa uu ka kooban yahay gobollada Bari, Nugaal, Sool, Cayn, karkaar, ***Mudug***, Heylaan iyo ***Sanaag.***

2. Midnimada dhulka Puntland ***waa lama taabtaan***, lagumana xadgudbi karo, lamana kala qaybin karo.

3. Puntland waxay soo dhaweyneysaa lana xaajooneysaa degmo iyo gobol kasta oo doonaya inuu ku soo biiro Dawladda Puntland.

4. Dhulka Puntland waxaa ku dhan hawada sare, berriga iyo dhulka hoostiisa, jiidda dhaqaalaha ee badda oo dhan 200 maylka badda ah oo ka bilawda halka uu ku dhammaado hirka ugu dambeeya, waxaana mas'uul ka ah Dawladda.

Qodobka 8aad
AFKA

Soomaaliga iyo Carabigu waa afafka rasmiga ah ee Dawladda Puntland, luqadaha kalana waa la adeegsan karaa

Qodobka 9aad
DIINTA

1. Diinta Islaamku waa tan kaliya ee Dawladda Puntland ee Soomaaliya.

2. Diin aan tan Islaamka ahayn laguma faafin karo dalka Puntland.

3. Qawaaniinta iyo dhaqanka bulshada waxaa saldhig u ah diinta Islaamka.

4. Waxaa reebban qaanuun iyo dhaqan kasta oo ka hor imanaya Diinta Islaamka.

Qodobka 10aad
MAGAALO MADAXDA

1. Magaalo madaxda Dawladda Puntland waa Magaalada Garoowe waana fadhiga ***dhexe ee*** dawladda.

2. Magaalo madaxda waxaa lagu dhaqayaa xeer u gaar ah.

Qodobka 11aad
CALANKA, ASTAANTA IYO HEESTA DAWLADDA PUNTLAND

1. Dawladda Puntland waxa ay yeelan doontaa Calan, Astaan iyo Hees u gaar ah.

2. Punland waxay Dawladda Federaalka ee Soomaaliya ay la wadaageysaa Calanka guud ee Soomaaliya, Astaanka iyo Heesta Qaranka, iyadoo kuweeda u gaarka ahna leh.

3. Calanka, Astaanta iyo Heestu waa tartan furan.

4. ***Xeer Madaxweyne ayaa lagu soo saarayaa xilliga tartanka, waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada*** .

Madaxa I2

XUQUUQDA AASAASIGA AH IYO DAMMAANAD-QAADKA QOFKA

Qaybta 1aad
XUQUUQDA SHAKHSIGA IYO LAALIDDEEDA

Xubinta Koowaad
XUQUUQDA SHAKHSIGA

Qodobka 11aad
SINNAANTA DADKA

1. Dhammaan dadku waa u siman yahay Sharciga hortiisa.

2. Qofna laguma takoori karo midabka, diinta, dhalashada, jinsiyadda, hantida, fikradda uu aaminsan yahay, siyaasadda, afka iyo isirka.

3. Dastuurka ayaa dammaanad qaadaya xuquuqda dadka laga tirada badan yahay.

Qodobka 12aad
XORRIYADDA CAQIIDADA

1. Qofka muslimka ahi caqiidadiisa kama noqon karo

2. Qofka aan muslimka ahayni xor ayuu u yahay Caqiidadiisa, lagumana khasbi karo mid kale.

Qodobka 13aad
XORRIYADDA FIKIRKA

1. Qof kasta xor buu u yahay fikraddiisa waana soo bandhigi karaa. Faafreeb horudhac ahi waa reebban yahay.

2. Qofku waxa uu fikraddiisa ku cabbiri karaa qaab hadal, saxaafadeed, qoraal, muuqaal, suugaan iyo habab kale oo sharciga iyo anshaxa waafaqsan.

Qodobka 14aad
AASAASIDDA IYO KA MID NOQOSHADA URURADA BULSHADA

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu aasaaso, ka mid noqdo ama ka qayb qaato hawlaha ururada dhaqan-dhaqaale, bulsho, Isboorti iyo cilmi, haddaan sharci ka reebin.

2. Aasaasidda ururadu waa inay waafaqsan yihiin qaanuunka dalka iyo danaha ummadda Puntland.

3. Waxaa reebban ururada leh dabeecad qabiil ama ciidan.

Qodobka 15aad
XORRIYADDA DHAQDHAQAAQA

1. Qof kasta waxa uu u madaxbannaan yahay inuu dalka ka maro ama ka dego meel kasta oo uu rabo iyo inuu dalka ka baxo kuna soo laabto goortii uu doono.

2. Sharci iyo xeer-hoosaadyo u gaara ayaa caddeyn doona xadaynta xaqa dhaq-dhaqaaqa.

Qodobka 16aad
LAHAANSHAHA HANTIYEED

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu hanti yeesho, u maamusho, ugana faa'iideysto si sharciga waafaqsan.

2. Sharciga ayaa qeexaya duruufaha iyo habraaca lagu xaddidi karo xaqa shakhsiga ee la xiriira hantidiisa.

3. Xorriyadda wax soo saarku way bannaan tahay, waxaase shardi u ah in wax soo saarayaashu ay oofiyaan shuruudaha sharci iyo maamul ee dalka u degsan.

4. Qofna lagama qaadi karo khidmad/kharash, hantidiisana lalama wareegi karo iyadoo aan loo cuskan sababo sharciga waafaqsan.

Qodobka 17aad
NOLOSHA QOFKA IYO NABADGELYEYNTA JIRKIISA

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay noloshiisa marka laga reebo qof lagu fuliyey xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.

2. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay nabadgelyada jirkiisa iyo sharaftiisa.

3. Waxaa reebban denbiyada laga galo xaqa nolosha iyo nabadgelyada qofka sida xasuuq, jirdil, xarig iyo dil aan sharciga waafaqsanayn.

Qodobka 18aad
MADAXBANNAANIDA QOFKA

1. Qofna madaxbannaanidiisa lagama qaadi karo, xannibaad kasta oo lagu sameeyana waa inay sharciga ku caddahay.

2. Addoonsiga iyo ka-ganacsiga dadku way reebban yihiin.

3. Madaxbannaanida qofka waxaa shardi u ah in aaney ka hor imanayn Shareecada Islaamka, xeerarka, anshaxa guud, xasiloonida dalka ama xuquuqda qof kale.

Qodobka 19aad
MAGANGELINTA SIYAASADEED & ISU-CELINTA EEDAYSANEYAASHA/DENBIILAYAASHA

1. Qofka shisheeyaha ah oo weydiista Dawladda Puntland magangelyo siyaasadeed waa la siin karaa, haddii uu buuxiyo shuruudaha u dhigan magangelinta, iyada oo la tixgelinayo heshiisyada caalamiga ee aan ka hor imaanayn shareecada islaamka..

2. Waxaa reebban in muwaaddin Puntland ah, **ama qof soomaali ah oo puntland ku nool** loo gacan geliyo dal kale.

3. Puntland way u gacangelin kartaa dalkii uu ka soo baxsaday denbiile ama eedaysane shisheeye ah haddii uu jiro heshiis isu-celin oo u dhexeeya Puntland iyo dalka weydiistay celintiisa/celinteeda.

4. Qofna looma dhiibi karo arrimo siyaasadeed awgood.

Qodobka 20aad
AMMAANKA HOYGA

1. Hoyga iyo meelaha kale ee la degganyahay waxay leeyihiin xurmayntooda.

2. Ma bannaana baaridda, basaasidda iyo gelidda hoyga amar Garsoore oo sababaysan la'aantiis, haddii aanu gelin hoyga qof dembiile ah oo boolisku ku raad-joogo ama aanu isla wakhtigaas fal-dembiyeed ka dhacayn hoyga dhexdiisa.

3. Waxaa waajib ah in si toos ah loogu akhriyo degganaha amarka Garsooraha inta aan lagu dhaqaaqin baarista, baarahana waxaa ka reebban ku xad-gudubka sharciga.

Qodobka 21aad
XAQA SAXAAFADDA

1. Saxaafadda iyo warbaahinta xorta ahi waa ay ka madaxbannaan yihiin faragelin dawladeed, waxayna u hoggaansamayaan sharciga oo keliya.

2. Xeer gaar ah ayaa xadidaya xorriyadda saxaafadda.

Qodobka 22aad
XORRIYADDA ISGAARSIINTA

Qofna lama faragelin karo waraaqihiisa boostada, xiriirkiisa isgaarsiineed iyo qoraalladiisa gaarka ah, marka laga reebo xaaladaha sharcigu banneeyo baaritaankooda, dabagalkooda, ama dhegaysigooda. Marka taas lagu tallaabsanayo waa inuu jiraa amar garsoore oo sababaysan.

Qodobka23aad
BANNAANBAXYADA

1. Qof kasta waxa uu xor u yahay in uu abaabulo, ka qaybqaato bannaanbaxyo ku salaysan hab nabadgelyo, waase in uu si qoraal ah ugu sii wargeliyaa hay'adaha ay khusayso, si uu u helo ruqsad qoraal ah.

2. Bannaanbaxyada waxaa lagu joojin karaa sababo lid ku ah Diinta Islaamka, caafimaadka, anshaxa, amniga iyo xasilloonida dalka.

Qodobka 24aad
XAQA DACWADDA IYO ISDIFAACA

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu dacwad ***Xeerka*** waafaqsan ka furto maxkamadda awoodda u leh.

2. Qof kasta waxaa uu xaq u leeyahay inuu iska difaaco maxkamdda horteeda.

3. Qof kasta oo aan iska difaaci karin maxkamadda horteeda, ama aan karin inuu qareen qabsado dawladda ayay waajib ku tahay in ay u qabato qareen difaaca.

4. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya sida uu caddaalad ku helayo qofkii aan awoodin bixinta ujuurada maxkamadaha.

Qodobka 25aad
DEMBIGA IYO CIQAABTA

1. Ciqaabta dembi waxay ku koobnaanaysaa ***qofka*** geystay fal-dembiyeedka.

2. Qofna looma qaban karo, xiri karo, loomana ciqaabi karo fal markii uu galay aan dembi ku ahayn sharciga..

3. Ciqaab aan maxkamad go'aamin cidna laguma fulin karo.

Qodobka 26aad
XUQUUQDA EEDAYSANAHA

1. Eedaysanaha waxaa loo aqoonsan yahay dembilaawe ilaa si ***Xeerka*** waafaqsan maxkamadi ugu xukunto gelid denbi ***kama dambays ah.***

2. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in la dhawro nabadgelyadiisa iyo sharaftiisa aadaminnimo.

3. Eedaysanaha laguma hayn karo meel aan ***Xeerku*** bannayn.

4. Eedeysane kasta waa in 48 saacadood gudahood ***lagu hor-geeyo*** maxkamad.

5. Eedaysanaha waa in maxkamadda awoodda u lihi si tifaftiran ugu akhrido uguna macnayso dembiga lagu soo oogey.

6. Eedaysanuhu waxa uu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan eheladiisa, qareenkiisa, dhakhtarkiisa iyo asxaabtiisa, waana la damiinan karaa haddii sharcigu oggol yahay.

7. Eedaysanuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu qareen difaaca qabsado.

8. Eedaysanaha laguma khasbi karo qirashada dembiga loo haysto**.**

Qodobka 27aad
XUQUUQDA QOFKA XUKUMAN

1. Qofka ay maxkamadi xukuntay oo xiran waxa uu xaq u leeyahay ilaalinta nabadgelyadiisa iyo sharaftiisa aadaminnimo.

2. Xukumanuhu waxa uu xaq u leeyahay in ay soo booqdaan eheladiisa, qareenkiisa, dhakhtarkiisa iyo asxaabtiisa.

3. Qofka maxbuuska ahi waxa uu xaq u leeyahay daryeel caafimaad, cunto iyo waxbarasho.

4. Qofka maxbuuska ah waxaa lagu dhaqayaa xuquuqda caalamiga ah ee maxaabiista.

5. Xukumanuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu Rafcaan ka qaato xukunkii maxkamaddu ku ridday.

Xubinta Labaad
LAALIDDA XORRIYADAHA MADANIGA AH

Qodobka 28aad
XAALADAHA DEGDEGGA AH

1. ***Haddii ay dalka ka dhacaan dagaallo,weerar lagu soo qaado,gadood,masiibooyin dabiici ah, cudurro faafa iyo xasilloonida dalka oo qalalaaso ku dhaco dammaanadaha ku cad qodobbada,13,15,20,21,22 iyo 23 si ku meel gaar ah waa loo laali karaa.Laalidda xuquuqda ku xusan qodobka 23 laguma dabbaqi karo kulamada iyo bannaanbaxyada diimeed,dhaqan iyo isboorti***

2. ***Xaaladda degdegga ah waxaa lagu soo rogi karaa dalka oo dhan ama qaybo ka mid ah.***

3. ***Golaha Xukuumadda oo keli ah ayaa soo rogi kara xaalad degdeg ah.***

4. ***Xaaladda degdegga ah kama ay badan karto 30 beri, haddiise ay weli taagan yihiin xaalaadihii khasbay Golaha Wakiillada oo keli ah ayaa cusboonaynsiin kara muddo aan 30 beri ka badnayn.***

5. ***Haddii ay suulaan duruufihii kalifay xaaladda degdeg ah ama aan Golaha Wakiilladu cusboonaysiin, xaaladda degdegu taagnaanmayso.***

Qaybta Labaad
XUQUUQDA BULSHADA

Xubinta 1aad
QOYSKA

Qodobka 29aad
XUQUUQDA QOYSKA

Qoysku waa aasaaska bulshada, oo ka bilowda nin iyo haweenay qaan gaaray oo si sharciga waafaqsan isku guursaday iyo carruurtooda, sharciga ayaana dammaanad qaadaya sugnaantiisa.

Qodobka 30aad
XUQUUQDA CARRUURTA

1. ***Carruur waxaa loola jeedaa qof kasta oo toban iyo shan sano (15) ka yar.***

2. Ilmuhu waxa uu xaq u leeyahay nolol, magac, jinsiyad, korriimo, waxbarasho iyo daryeel caafimaad..

3. Waxaa reebban shaqada wax u dhimaysa carruurta noloshooda, caqiidadooda, dhaqankooda, korriimadooda iyo waxbarashadooda.

4. Waxaa reebban in la soo rido ilmaha caloosha hooyada ku jira, haddii aanay jirin xaalad adag oo hooyada nolosheeda khatar gelineysa, uuna caddeeyo dhakhtar aqoonteeda leh.

Qodobka 31aad
WAXBARASHADA

1. Qof kasta xaq ayuu u leeyahay inuu waxbarasho helo.

2. Horumarinta iyo baahinta waxbarashadu waa waajib saaran Dawladda.

3. Dawladda ayaa u xilsaaran ciribtirka akhris iyo qoris la'aanta, iyo horumarinta Af-Soomaaliga.

4. Waxbarashada aasaasiga ah ee carruurtu waa khasab, Dawladda ayaana u xilsaaran helitaanka agabka iyo hawlwadeennada waxbarshada. Marka ay

duruuftu saamaxdo, dawladdu waxa ay kor u qaadeysaa heerka waxbarashada khasabka ah.

5. Dawladdu waxay dhiirrigelineysaa isla maarkaasna tayeneysaa waxbarashada diineed ee dugsiyada Qur'aanka.

6. ***Waa mas'uuliyadda Dawladda diyaarinta, tayeynta iyo hubinta ku dhaqanka manhaj midaysan ee heerarka dugsiyada hoose, dhexe iyo sare.***

7. Barashada iyo tarbiyadda diinta Islaamku waa dariiqad aasaasi ah, dhammaan heerarka waxbarashada hoose, dhexe iyo sare.

8. Qofka qaangaarka ahi waa u madaxbannaan yahay doorashadiisa waxbarasho iyo xirfadeed, Dawladdana waxaa waajib ku ah dhiirrigelinta waxbarashada dadka waaweyn iyo tan haweenka.

9. Waxaa la furan karaa dugsiyo waxbarasho, kuwo xirfadeed iyo jaamacado gaar ah oo waafaqsan manhajka Dawladda, kuna salaysan baahida iyo siyaasadda waxbarashada dalka.

10. Dawladda xil ayaa ka saaran horumarinta hiddaha iyo dhaqanka.

11. Dawladda waxaa waajib ku ah in ay taabbageliso tacliinta sare.

12. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya waxbarashada gaarka ah.

Qodobka 32aad
CAAFIMAADKA

1. Waa mas'uuliyadda Dawladda in ay daryeesho caafimaadka guud ee dadweynaha, ka hortag iyo daaweynba, gaar ahaan carruurta iyo haweenka.

2. Si loo fuliyo waajibaadkaas, Xukuumaddu waxay dajineysaa nidaam caafimaad ee waddani ah.

3. Dawladdu waxay ogoshahay furasho xarumo caafimaad, iyadoo ay takhaatiirtuna xirfaddooda ku shaqeysan karaan. Hawlahaas waxaa nidaaminaya xeer gaar ah. .

Qodobka 33aad
AGOOMAHA,CURYAAMADA,GARAAD DHIMANKA IYO DADKA GABOOBEY

1. ***Agoonta,curyaamiinta,garaad-dhimmanka,dadka gaboobey iyo qof kasta oo aan is daryeeli karin, cid daryeeshaana aanay jirin, dawladda ayay waajib ku tahay in ay daryeesho.***

2. ***Dawladdu waa in ay dhiirrigelisaa, samaysaana hay'ado gargaara iyo xarumo lagu xannaaneeyo dadka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan.***

3. ***Xeer gaar ah ayaa qeexaya dadka loo aqoonsanayo in aaney isdaryeeli karin.***

Qodobka 34aad
XUQUUQDA HAWEENKA

1. Dawladda waxaa waajib ku ah horumarinta iyo dammaanad qaadka xuquuqda haweenka. si waafaqsan diinta Islaamka.

2. Haweenku waxay xuquuda kala siman yihiin ragga, marka laga reebo wixii ILAAH u kala gaar yeelay..

Qodobka 35aad
XUQUUQDA DHALLINYARADA IYO HORUMARINTA ISBOORTIGA

1. Dawladdu waxay ahmiyad gaar ah siineysaa daryeelka, barbaarinta,horumarinta dhalinyarada iyo isboortiga.

2. ***Dhismaha ururo dhalinyaro, daryeelka dhalinyarada iyo horumarintooda waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah***

Qodobka 36aad
XUQUUQDA SHAQAALAHA

1. Dawladdu waxay u xil saaran tahay shaqo-abuurista iyo tayeynta tababarrada shaqaalaha.

2. Waxaa reebban shaqo khasab ah, haddii aan qaanuunku si kale u tilmaamin.

3. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay mushahar u dhigma shaqada uu qabto.

4. Shaqaale kasta waxa uu xaq uu leeyahay maalin nasasho ah toddobaadkiiba, fasax sannadeed, fasaxa ciidaha ee qaanuunku jideeyay. Haweenka waxaa intaas u dheer fasaxyada dhalmada iyo naas-nuujinta. Shaqaalaha fasaxa ku jira waxba iska dhimi mayaan xuquuqdooda mushaar.

5. Dawladdu waa in ay daryeeshaa shaqaalaha jir ahaan iyo damiir ahaanba.

6. Shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin in ay cabashadooda ku muujiyaan bannaanbax ama shaqo-joojin si xeerka waafaqsan. Ciidammada qalabka sida shaqa joojin ma samayn karaan.

7. Shaqaalaha iyo loo shaqeeyayaashuba waxay xaq u leeyihiin iney yeeshaan ururro maareeya una dooda danahooda.

8. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu doorto shaqada iyo loo shaqeeyaha uu doorbido.

9. Dhismaha, doorka iyo waajibaadka ururrada shaqaalaha waxaa lagu qeexi doonaa xeer gaar ah.

Qodobka 37aad
BADBAADADA SHAQAALAHA

1. Dawladda ayaa dejinaysa sharciga shaqaalaha isla markaana samaynaysa hay'adaha dammaanad qaadaya xaqa hawlgabka shaqalaha gaarka ah iyo kan dawladdaba.

2. Qof kasta oo xil u haya dawladda oo ku dhaawacma, ku jirrada ama ku naafooba shaqada, waxa uu xaq u leeyahay daryeel qaanuunka waafaqsan.

3. Qof kasta oo Dawladda u shaqeeya oo ku geeriyooda hawlgal, waxaa laga bixiniyaa magdhow sharciga waafaqsan.

4. Xukuumaddu waxay shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ahba u dejineysaa hab dammanad-qaad shaqaale oo ay maalgeliyaan dawladda, loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhuba.

Qaybta 3aad
MUWAADINIINTA IYO HABRAACA DOORASHOOYINKA

Qodobka 38aad
MUWAADINNIMADA

1. ***Qof kasta oo u dhashay Puntland ama ku kasbaday Puntlandnimada qaab sharci ah waxaa loo aqoonsanayaa inuu yahay muwaadin Puntland ah.***

2. Muwaaddinka Puntland luminmaayo muwaaddinnimidiisa haddii uu qaato jinsiyad dal kale.

Qodobka 39aad
WAAJIBAADKA MUWAADINKA

1. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah:

(b) ***Dhawridda diinta Islaamka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka iyo kuwa caalamiga ee aan ka hor imaanayn sharciga.***

(t) Adkaynta midnimada ummadda iyo ilaalinta jiritaanka qarannimada Puntland.

(j) Codbixinta xilliyada doorashooyinka.

(x) Bixinta canshuuraha ku waajibay.

(kh) Ka qaybgalka difaaca Puntland markii loogu yeero ama ay la soo gudboonaato.

2. Sharciga ayaa qeexaya ciqaabta lagu mutaysanayo gudasho la'aanta waajibaadka ku xusan qodobkan.

Qodobka 40aad
XUQUUQDA MUWAADINKA

Muwaadin kasta oo da'adiisu gaartay siddeed iyo toban (18) sano, wuxuu xaq u leeyahay:

(b) Inuu ka qayb-galo hawlaha doorashooyinka iyo inuu cod bixiyo.

(t) Inuu sameeyo ama ku biiro ***urur ama*** xisbi siyaasadeed.

(j) In uu xilliyada doorashada u tartamo xilalka dalka, haddii uu shuruudaha buuxiyo.

Qodobka 41aad
XAQA BANDHIGIDDA CABASHADA

1 Muwaaddin kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu cabashadiisa qoraal ugu diro Madaxweynaha, Baarlamaanka, xukuumadda, iyo madaxda kale ee dawladda.

2. ***Xafiiska uu qoraalka cabashadu u socdo waa inuu ka jawaabo (30) beri gudahood***.

Qodobka 42aad
HAKINTA XUQUUQDA SIYAASADEED IYO XIL-QABASHO EE MUWAADINKA

Xuquuqda muwaadinka waa la hakin kara haddii ay dhacdo:

(b) In qofka maxkamadi ku rido xukun ciqaabeed oo kama dambays ah, oo ah nooyada lagu lumiyo xuquuqda siyaasadeed iyo xil qabasho ee ku cad xeerka ciqaabta.

(t) In qofku yahay garaad-dhimman, ama Maxkamadi caddayso inaanu gudan karin xilkiisa.

Qodobka 43aad
DOORASHOOYINKA

1. Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha doorashada wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto lana doorto.

2. Xubnaha Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Degmooyinka waa mansabyada dadweynuhu tooska u dooranayaan.

3. U codaynta mansabyadaas waa inay u dhacdaa si caddalad iyo xor ah oo waafaqsan nidaam sharci ah oo ay maamulayso hay'ad madaxbannaan oo leh awood Dastuuri ah.

4. Codbixintu waxay noqonaysaa mid caam ah, dadku u simanyahay, shakhsi ah, qarsoodi ah, waxaana reebban in qof lagu farageliyo doorashada meesha uu codka marinayo.

5. Sharciga ayaa xadidaya aagagga doorashooyinka ee Golaha Wakiillada iyo Golayaasha Degmooyinka. Tirada kuraasta uu gobol ku yeelanayo Golaha wakiillada iyo xubnaha golayaasha degmooyinka waxay ku xirnaanaysaa hadba inta uu le'eg yahay dadweynaha ku nool gobolka ama degmada.

6. Taariikhda ay qabsoomeyso doorashadu waxaa goynaya Guddiga doorashada, waase in aaney noqon laba bilood ka yar ama afar bilood ka badan dhammaadka muddada golayaasha wakiillada iyo deegaanka markaas xilka haya.

7. Inta aan la gudo gelin doorashooyinka waa inuu jiro sharci gaar ah oo lagu hagayo arrin kasta oo la xariirta doorashada.

Qodobka 44aad
DADKA AAN IS- SHARRIXI KARIN

1. Dadka ka tirsan Ciidammada Qalabka Sida ee aan hawlgabka ahayan iyo garsoorayaashu, xubin kama noqon karaan xisbiyada siyaasadda, isumana sharrixi karaan doorashooyinka.

2. Hawlwadeennada dawladda isma sharrixi karaan haddi aanay iska casilin xilalka ay hayaan. Sharciga doorashada ayaa sheegaya wakhtiga kama dambaysta ah ee ay tahay inay is casilaan haddii ay doonayaan inay tartanka doorashooyinka ka qaybgalaan.

Qodobka 45aad
XISBIYADA SIYAASADEED

1. Dawladda Puntland waxaa lagaga dhaqmayaa nidaamka xisbiyada badan.

2. ***Tartanka doorashadu waa u furan yahay dhammaan ururada buuxiya shuruudaha looga baahanyahay.***

3. ***Saddexda xisbi siyaasadeed ee ugu codadka badan doorashada ugu horreysa ee Golayaasha Deegaanka ayaa xaq u yeelanaya inay noqdaan xisbiyada siyaasadeed ee sharciga ah, waana in uu xisbi kasta ka furan yahay dhammaan goballada puntland,labadii xilli doorasho ka dibba waxay xisbiyadu galayaan tartan doorasho.***

4. Waxaa reebban xisbiyada iyo ururrada leh muuqaal ciidan ama qabiil.

5. Qofkii magac xisbi doorasho ku gala kuna guuleysta kursi, kadibna ka baxa xisbiga, wuxuu luminayaa kursigii xisbiga ee uu ku guuleystey.

6. Hantida Qaranka ee si guud looga faa'iidaysto sida garoommada ciyaaraha, barxadaha iyo warbaahinta Dawladda, xisbiyadu si siman ayay ugu fushan karaan ololayaashooda siyaasadda iyo hawlahooda xisbi oo kaleba. Goobaha kale ee dawladda iyo hantida dawladda looma adeegsan karo hawlo xisbi iyo ololayaal doorasho.

7. Qof kasta oo lagu eedeeyo inuu hanti qaran u isticmaalay dano xisbi, maxkamad ayaa la horgeynayaa.

8. Xeerar iyo nidaamyo ayaa lagu maamulayaa axsaabta siyaasadeed, kuwaasoo lagu qeexayo shuruuc kala gadisan oo ay Xukuumaddu soo jeediso, Golaha Wakiilladuna ogolaado.

Qodobka 46aad
SHURUUDAHA FURASHADA XISBI SIYAASADEED

1. Xisbina kama qayb geli karo doorashooyin haddii aanu sharciyayn Guddiga Doorashada Puntland (GDP).

2. Si xisbi loo sharciyeeyo, waxaa shardi ah inuu leeyahay barnaamij siyaasadeed iyo xeer hoosaad haga hawlihiisa.

3. Guddiga Doorashada Puntland ayaa ka baarandegeya ***qoraallada*** xisbigu soo bandhigo, waxaana la isku hortaagi karaa, haddii barnaamijka ama xeer-hoosaadkiisa ay khilaafsan yihiin Dastuurka iyo shuruucda kale.

4. Sharci gaar ah oo baarlamaanku ansixiyay ayaa qeexaya dhaqangelinta qodobka ***45.2,*** shuruudaha iyo habraacyada kale ee la xariira sharciyaynta ururrada siyaasadda.

5. Haddii saddexda xisbi ee sharciga midkood burburo ama la xiro, Guddiga Doorashada Puntland ayaa ururkii siyaasadeed ee kaalinta ku xigta ka galay doorashada Golayaasha Degaanka ee ugu dambeeyay ugu yeeraya inuu noqdo xisbiga siyaasadeed ee kaalinta bannaanaatay buuxinaaya.

Madaxa III
DHAQAALAHA

Qodobka 47aad
HANNAANKA DHAQAALAHA

Hannaanka dhaqaalaha ee Puntland waa in dhammaan dadka Puntland ay helaan nolol u qalanta karaamadooda bani-aadaminnimo, iyo in qof kastaa helo arrimaha lama huraanka ah, si waafaqsan mabaadiida ***caddaaladda*** bulshada.

Qodobka 48aad
DHAQAALAHA SUUQA XORTA AH

1. Hannaanka ganacsi ee Puntland wuxuu ku salaysan yahay suuqa xorta ah, wuxuuna dhirrigelinayaa, isla markaasna dammaanad qaadayaa maalgashiga waddaniga ah iyo kan ajnebiga ahba.

2. Hawlaha ganacsiga waxaa saldhig u ah tartanka xorta ah.

3. Sharciga ayaa dhiirrigelinaya, hagayana tartanka xorta ah iyo xakamaynta suuq-xirashada.

Qodobka 49aad
KAALINTA DHAQAALAHA EE DAWLADDA

1. Dawladdu waxay dhiirrigelinaysaa horumarin dhaqaale oo joogtaysan, waxayna kaashanaysaa dhaqaalaha gaarka loo leeyahay si kor loogu qaado wax soo saarka. Kobcinta ganacsatada heerka dhexe, wax-soo-saarayaasha yar yar iyo iskaashatooyinku waxay yeelanayaan mudnaan gaar ah.

2. Dawladda ayaa ilaalineysa khayraadka dalka, waxayna dammaanad qaadaysaa in cid walba si sharciga waafaqsan oo joogtaysan uga faa'iidaysato.

3. Dawladdu waxay ilaalinaysaa awoodda wax-gadashada ee dadweynaha, gaar ahaan kuwa danyarta ah.

Qodobka 50aad
SHIRKADAHA WADAAGGA AH

1. Xukuumaddu waxay samayn kartaa, kana qayb-geli kartaa shirkado wadaag ah oo ay saamilay ka yihiin maalgeliyayaal waddani ah iyo kuwa ajnebi ahba.

2. Madaxda shirkadaha wadaagga ah waxaa isla magacaabaya wasaaradda hawlaheedu la xiriiraan iyo saamileyda gaarka ah.

3. Habka dhismaha, maamulka iyo saami-qaybsiga Sharikadaha Wadaagga ah waxaa qeexaya xeer gaar ah.

Qodobka 51aad
GADIDDA HANTIDA UMMADDA

1. Wareejnta hanti kasta ee dawladdu leedahay waa in la mariyo habraac sharciga waafaqsan.

2. Lama iibin karo hanti ummadeed haddii aanay Dawladdu dhinac ka ahayn ..

3. ***hanti kasta oo qiimaheedu ka yar yahay $50,000 waxaa awood u leh Golaha Xukuumadda, wixii kabadan($50,000 waxay u baahanaysaa ogalaanshaha Golaha Wakiillada***)

4. Gadidda hantida dawladda waxaa loo marayaa habka tartanka xaraashka furan.

Qodobka 52aad
QARAMAYNTA HANTIDA GAAR AHAANEED

1. Hantida qofku ku helay si xeerka waafaqsan, waxaa loola wareegi karaa dan guud oo keli ah, iyadoo isla markaana la bixinayo magdhow ***u dhigma***.

2. Xeer ayaa xadaynaya hantida gaarka ah ee loola wareegi karo dan guud iyo habraaca loo marayo qaramaynteeda.

Qodobka 53aad
KHAYRAADKA DABIICIGA AH

1. Khayraadka dabiiciga ah ee Puntland waxaa leh dadka Puntland, waxaana looga faa'iideeysan karaa si waafaqsan sharciga.

2. Dawladda Puntland ayaa ka mas'uul ah ilaalinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadkeeda dabiiciga ah.

3. Dawladda Puntland waxay heshiis la geli karta shirkado waddani iyo kuwo ajnebi ah, waxayna siin kartaa ruqsadda ka faa'iidaynta khayraadka dabiiciga ah.

4. Ruqsad kasta oo la xiriirta ka faa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah waxaa bixinteeda soo habaynaaya Golaha Xukuumadda waxaana oggolaanaya Golaha Wakiillada.

5. Qaabka saami qaybsiga khayraadka dabiiciga ah ee Puntland waxaa qeexaya xeer gaar ah oo uu Golaha Xukuumaddu u gudbinaayo Golaha Wakiilada si uu u ansixiyo.

Qodobka 54aad
ILAALINTA DEGAANKA

1. Dawladda iyo dadweynaha Puntland waxaa waajib ku ah ilaalinta, dhawrista iyo soo kabashada deegaanka, waana in si cad loogu qeexo heshiis kasta oo la galayo, isla markaana waafaqsan xeerka ilaalinta deegaanka.

2. Waxaa reebban baabi'inta kaymaha, laynta duurjoogta, xaalufinta badda, diqaynta dhulka, hawada iyo badda. Cid kasta oo geysata xadgubyada ku xusan faqraddan waxay mutaysanaysaa ciqaab sharciga waafaqsan.

3. Waxaa reebban dhoofinta dhuxusha, xoolaha dhaddiga ah duur-joogta iyo wax kasta oo saameyn ku yeelan kara xaalufinta deegaanka.

4. Degaan lagama samayn karo ***meel aan ku habboonayn,*** Dawladduna oggolaan.

5. waxaa reebban xirmaynta dhul daaqsimeedka

6. Dawladdu waxay ilaalinaysaa, islamarkaana xilliyeynaysaa ugaarsiga badda.

7. Xeer gaar ah ayaa nidaamin doona ilaalinta deegaanka

Madaxa IV

Qaab-Dhismeedka Dawladda

Qaybta Koowaad
Hay'adaha Aasaasiga ah ee Dawladda

Qodobka 55aad

Hannaanka Dawladda

Hannaanka Dawladda Puntland waa baarlamaani; Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku Xigeenka waxaa dooranaya Golaha Wakiillada.

Qodobka 56aad
QAYBAHA DAWLADDA

Dawladdu waxay u qaybsantaa saddex qaybood oo kala ah:

(b) Golaha Wakiillada

(t) Qaybta Fulinta

(j) Garsoorka

Qodobka 57aad
KALA SOOCNAANTA QAYBAHA DAWLADDA

1. Qayb kasta waxay u madaxbannaan tahay gudashada waajibaadyada, xilalka iyo awoodaha dastuurku u jideeyey, qaybina qaybta kale ma hoos timaado, marka laga reebbo arrimo gaar ah oo dastuurku si cad u qeexayo.

2. Fulinta waajibaadka iyo xilalka qaybi leedahay qayb kale waa ka reebban tahay.

3. Qofna xubin kama noqon karo isku mar, wax ka badan hal qayb oo dawladda ka mid ah.

Qodobka 58aad
WADASHAQAYNTA QAYBAHA DAWLADDA

Iskaashiga iyo wadashaqaynta saddexda qaybood ee dawladdu waa waajib dastuuri ah, ***waxayna ku wadashaqaynayaan si sharciga waafaqsan.***

Qaybta 2aad
XEER-DEJINTA

Xubinta 1aad
Golaha Wakiillada

Qodobka 59aad
GOLAHA WAKIILLADA

1. Awoodda Xeer-Dejinta ee Puntland waxaa leh Golaha Wakiilladda oo matala shacabka Puntland oo dhan.

2. ***Inta laga helayo tiro koob sugan, Golaha Wakiilladu waxaa uu ka koobnaanayaa 66 xilldhibaan oo dadweynuhu ku soo doorto codbixin guud oo toos ah.***

3. Muddada Golaha Wakiilladu waa shan (5) sano laga bilaabo maalinta natiijada doorashada lagu dhawaaqo. Xildhibaannada Golaha Wakiillada dib ayaa loo soo dooran karaa.

4. Golaha Wakiilladu waxa uu si rasmi ah hawshiisa u bilaabayaa soddon 30 maalmood gudahood, laga bilaabo maalinta natiijada doorashadu lagu dhawaaqo.

Qodobka 60aad
SHURUUDAHA LAGAGA MID NOQON KARO GOLAHA WAKIILLADA

Golaha Wakiillada waxaa loo dooran karaa qof kasta oo buuxiya ***shuruudaha*** soo socda:-

(b) In uu yahay muwaadin Puntland ah, Muslim ah, ***guta waajibaadka diiniga ah,*** xilkas ah, anshax wanaagsan, miyirkiisu dhan yahay, da'diisuna aanay ka yarayn soddon (30) sano.

(t) In aan xuquuqdiisa muwaadinnimo xukun maxkmadeed lagaga laalin shantii sano ee la soo dhaafay.

(j) In uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare **ama waayo-aragnimo u dhiganta**

(x) Ka hor inta aan qofka la ogolaan musharaxnimadiisa, Guddiga Doorashadu waa in uu hubiyo in musharaxu buuxiyey shuruudihii ku cad qodobkan.

Qodobka 61aad
SABABAHA LAGU LUMIN KARO XUBINNIMADA

GOLAHA WAKIILLADA

1. Xubinnimada Golaha Wakiillada waxaa lagu lumin karaa haddii

(b) ay xubintu geeriyooto.

(t) la soo gudboonaato xaalad xilgudasho la'aaneed oo joogta ah..

(j) xubintu ay istiqaalad keento, Goluhuna ka aqbalo.

(x) xubintu ay ka maqnaato labo kalfadhi oo isku xiga, sabab la' aan.

2. Haddii xubin ka mid ah Golaha Wakiillada ay lumiso xubinnimadeeda waxaa badalkeeda soo galaya qofkii ***xubin sugaha u ahaa.***

3. Sharciga doorashada ayaa tilmaamaya habraaca loo marayo xulashada xubinta badaleysa, waana in lagu dhaariyo 30 beri gudahood.

Qodobka 62aad
HABRAACA GOLAHA WAKIILLADA

1. Golaha wakiilladu, fadhiga ugu horreeya waxa uu iska dhex-dooranayaa guddoomiye iyo laba ku-xigeen oo kala ah koowaad iyo labaad.

2. Kalfadhiga koowaad ee Golaha, waa in lagu meelmariyo xeer-hoosaadka lagu socodsiinayo hawlaha Golaha.

3. Goluhu wuxuu iska dhex dooranayaa guddi joogta ah oo ururiya, fuliyana hawlaha golaha si ku meel gaar ah kal-fadhiyada dhexdooda.

4. Habka codaynta goluhu waa gacan taag ama qarsoodi hadba kii goluhu iskuraaco.

5. Fadhiyada goluhu waa u furan yihiin dadweynaha haddii aanu ahayn shir al baabadu u xiran yihiin.

6. Goluhu wuxuu yeelanayaa xoghaye joogto ah, oo aan xubin ka ahayn Golaha Wakiillada, ***Waxaana magacaabaya guddoonka golaha.***

Qodobka 63aad
AWOODAHA GOLAHA WAKIILLADA

Golaha Wakiilladu wuxuu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Dib u eegidda, Ogolaanshaha, diidmada, wax-ka-bedelidda iyo burinta Xeerarka Puntland

2. Ansixinta/diidmada xaalad dagaal iyo meelmarinta heshiis nabdeed marka xukuummaddu soo jeediso

3. Inuu cod ½ + 1 kala badh iyo hal tirada xubnaha Golaha ku Ansixiyo heshiis amaah qaadasho ee Puntland la gasho amaahiye ajnabi ah.

4. Inuu cod ½ + 1 kala badh iyo hal tirada xubnaha Golaha ku Ansixiyo heshiisyada caalamiga ah ee Dawladda Puntland dhinac ka tahay.

5. Ansixinta/ diidmadda degmo amad gobol cusub oo xukuumdadu soo jeediso.

6. ***Ka doodista, karmeeridda, dhaliilidda iyo talo-ku-biirinta siyaasadda iyo barnaamijka wax- qabadka xukuumadda..***

7. ***Hubinta iyo daba galka meel marinta xeerarka goluhu ansixiyey.***

8. ***Goluhu waxuu dooranayaa madaxweynaha iyo ku madaxweyne ku xigeenka, oo lagu dooranayo, si shakhsi, sinnaan. Toos ama qarsoodi, Marka 1aad iyo Marka 2aad waa sadex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha golaha wakiillada, marka 3aad waa hal dheeri.***

9. ***Goluhu wuxuu ku dooranayaa Difaacaha xuquuqda Adanaha, (3) saddexda xubnood oo ka mid noqonaya guddiga Doorashada iyo (2) labada garsoore oo ka mid noqonaya maxkamadda dastuuriga ah, waxaana loo marayaa habraaca doorashada ee Golaha Wakiillada.***

10. ***Ansixinta/diidmada hawl wadeennada golaha fulinta ee xasaanad siinta u baahan***.

11. ***Ansixinta/cellinta barnaamijka waxqabad ee Xukuumadda.***

12. ***Ansixinta/ celinta wax-ka-bedelka miisaaniyadda iyo is-bedel kasta oo lagu sameeyo madaxyadeeda.***

13. ***Ogolaanshaha/diidmada xisaab-xirka miisaaniyadda sannadkii hore.***

14. ***Ogolaanshaha canshuuraha ay xukuumaddu ka qaadayso dadweynaha ka hor inta aan lagu dhaqmin.***

15. ***Ogolaanshaha/diidmada xaaladda degdegga ah ee xukuumadu soo saarto muddo 30 casho guduhood ah. Haddii goluhu diido wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, hase yeeshee hawlihii lagu fuliyey waxay noqonayaa ansax, haddii aan maxakamadda dastuuriga ahi u aqoonsan mid dastuuuka ka soo horjeeda.***

16. ***Inuu ku ansixiyo xukuummadda kala bar iyo hal (½+1) tirada guud ee xubnaha golaha wakiillada mid mid iyo wadarba.***

17. ***wuxuu u yeeri karaa musuuliyiinta sarsare ee Dawladda si wax looga waydiiyo hawlaha loo igmaday. Haddii mas'uul loo yeeray cudurdaar la'aan ka baaqsado inuu hortago Golaha ama guddi-hoosaadyadiisa, goluhu wuxuu war galinayaa madaxweynaha waxaana loo qaadayaa codka kalsoonida.***

18. ***Xasaanad ka qaadista mas'uul lasta oo xasaanad leh haddii uu Xeer-Ilaaliyaha guud soo hordhigo caddayn ku filan oo la xiriirta gelid faldambiyeed culus. Goluhuna ku qanco.***

19. ***Haddii Mas'uul xasaanad leh la qabto isagoo dembi culus faraha kula jira,waxaa la weydiisanayaa golaha wakiillada socodsiinta dacwaddiisa, goluhuna wuxuu ogolaanayaa marka uu hubiyo ka dib.***

20. ***Ogolaanshaha/diidmada daabacaadda lacagta.***

21. Ogolaanshaha hindisayaasa xukuumadda ee la xiriira curinta ama baabi'inta haya'daha dawladda.

22. In uu u gudbiyo Golaha Xukuumadda talooyinka la xiriira ku dhaqanka Miisaaniyadda iyo wax ka bedelidda xeerarka Maaliyadda ka dib marka uu Goluhu dhegeysto warbixinta hanti-dhowrka guud.

Qodobka 64aad
KALFADHIYADA GOLAHA WAKIILLADA

1. Golaha Wakiilladu waxa uu yeelanayaa laba kalfadhi oo caadi ah sannadkiiba, kuna kala aaddan bilaha Juun iyo Oktoobar, wuxuu kaloo yeelan karaa Kalfadhiyo aan caadi ahayn.

2. Kalfadhiga aan caadiga ahayan, waxaa isugu yeeri kara Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, Madaxweynaha, ama waax (¼) xubnaha golaha wakiillada, kadib marka la helo codsi sababeysan.

Qodobka 65aad
KALA DIRIDDA GOLAHA WAKIILLADA

1. Golaha Wakiillada waxaa la kala diri karaa markii:

   (a) Ay is casilaan, aqlabiyadda Golaha Wakiilladu.

   (b) Goluhu fariisan waayo labo kalfadhi oo isku xiga, sabab la'aan.

2. Markii ay dhacaan qaar ka mid ah ama dhamaantood arrimaha ku xusan faqradda 1aad xarfaha a&b Madaxweynuhu wuxuu Maxkamadda Dastuuriga ah u gudbinayaa qoraal uu ku dalbanayo sugnaanshaha arrimaha ku xusan faqradda 1aad.

3. Markii ay u caddaato maxkamadda Dastuuriga ah gelidda faqrada 1aad xarfaha a&b waxey Madaxweynaha u gudbinaysaa in ay sugnaatay eedeynta lagu soo oo gay golaha wakiillada.

4. Madaxweynuhu marka uu helo caddaynta Maxkamadda Dastuuriga ah, wuxuu soo saarayaa go 'aanka kala dirista Golaha. Wuxuuna ku dhawaaqayaa in Gole cusub lagu soo doorto muddo (45)casho gudohood ah.

Qodobka 66aad
KALSOONI KALA NOQOSHADA WASIIRADA

1. Golaha Wakiilladu wuxuu kalsoonida kala noqon karaa wasiirada mid, ka badan ama dhammaantood.

2. Kalsooni kala-noqoshada wasiirada waxaa soo jeedin kara ugu yaraan lix ***(6)*** Xildhibaan.

3. Ka doodidda mooshinka kalsooni kala-noqoshada Wasiirada waa in ay ogolaadaan ugu yaraan saddex meelood oo meel (1/3) xildhibaannada Golaha Wakiillada.

4. ***kala badh iyo hal (1/2+1)*** tirada xubnaha Golaha ayaa kalsoonida kala noqon kara Wasiirada.

5. Haddii cod kalsooni kala-noqosho uu meelmaro, Madaxweynuhu waa inuu magacaabo beddelka Golihii ama Wasiirkii codka kalsoonida waayey; Goluhu hawshiisu waa uu sii wadanayaa ilaa Gole cusub laga magacaabo, hase yeeshee ma bilaabi karaan barnaamij cusub.

6. Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu ***hal mar*** Golaha Wakiillada dib ugu celiyo magacaabista xubnaha Golaha Xukuumadda ee kalsoonida waayey.

7. Haddii ay Xukuumaddu dhacdo, Madaxweynuhu wuxuu ***21 beri*** gudaheed Golaha Wakiillada ku horgeynayaa Xukuumad cusub si loo ansaxiyo.

Xubinta 2aad
Habka Sameynta Sharciga

Qodobka 67aad
CURINTA SHARCIYADA

1. Golaha wakiillada waxaa mashruuc-sharci horgeyn kara oo keli ah:

   (b) ***xubin kasta oo katirsan*** Golaha Wakiillada.

   (t) Golaha Xukuumadda.

   (j) Tiro muwaadiniin ah oo aan ka yarayn 5.000 (shan kun) oo qof oo cod bixiyeyaal ah.

Qodobka 68aad
NIDAAMKA HAL-ABUURKA MUWAADINIINTA

1. ***Muwaadiniinta soo bandhigeysa codsi qoraal ah , waa in la hubsado warqadahooda aqoonsi ama ugu yaraan magacyadooda , da'dooda , saxiixyadooda, iyo inay caddeeyaan inay yihiin muwaaddiniin Puntland ah.***

2. Codsiga waa inuu la socdo soo jeedinta mashruuc sharci ah iyo magacyada ugu yaraan laba qof oo lagala soo xiriiro.

3. Mashruuc sharci ee ku saabsan cashuur, kharashka dawladda, difaaca dalka ama amniga, muwaadiniintu ma soo jeedin karaan.

4. Golaha Wakiilladu waxaa la gudboon in ay hal-abuurkaas ku qiimeeyaan kalfadhiga socda ama kan ku xiga, jawaabna siiyaan codsadayaasha.

Qodobka 69aad
DOODDA GOLAHA EE MASHAARIICDA SHARCIYADA

1. Golaha Wakiilladu waa in uu mashruuc-sharci oo kasta uga doodo qodob qodob, uguna codeeyo.

2. Sharci kasta oo Goluhu meelmariyo waa in laga sameeyo saddex nuqul oo rasmi ah oo ay saxiixaan hoggaanka Goluhu loona diro Madaxweynaha.

3. xeer goluhu diiday dib looguma soo celinkaro isla kal fadhiga markaas socda

Qodobka 70aad
SAXIIXA MADAXWEYNAHA IYO FAAFINTA

1. Madaxweynuhu muddo soddon (30) beri gudohood, waa inuu ku saxiixo ama ku diido xeer kasta oo Golaha Wakiilladu ogolaaday..

2. ***Marka Madaxweynuhu saxiixo xeerka wuxuu amrayaa in faafinta rasmiga ah lagu soo saaro saddexda nuqul ee asalka ah, waxaana lagu kaydinayaa Xafiisyada Madaxtooyada, Golaha Wakiillada & Garyaqaanka Guud***.

3. Xeerku wuxuu dhaqan galayaa shan iyo toban (15) maalmood gudahood, laga bilaabo maalinta faafinta rasmiga ah lagu soo saaro.

Qodobka 71aad
DIIDMADA QAYAXAN EE MADAXWEYNAHA

Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay inuu diidmada qayaxan isku hortaago sharci uu meelmariyay Golaha Wakiilladu, isaga oo diidmadiisa ***raacinaya*** qoraal sababaysan.

Qodobka 72aad
JEBINTA DIIDMADA QAYAXAN

1. Diidmada qayaxan ee Madaxweynaha waxaa Golaha Wakiilladu ku jebin karaan markii ay isla sharcigaas mar labaad u codeeyaan kuna meelmariyaan aqlabiyad saddex meelood laba meelood (2/3).

2. Hogaanka Goluhu wuxuu u dirayaa Madaxweynaha sharcigii oo uu la socdo qoraalkii uu ku jabiyay diidmada qayaxan.

3. ***Madaxweynuhu marka uu helo qoraalka waa in uu saxiixo Xeerka kuna amro Garyaqaanka Guud in uu ku soo saaro faafinta rasmiga ah muddo shan iyo toban (15) beri gudohood***.

Qaybta 2aad

FULINTA

Qodobka 73aad
HAY'ADDA FULINTA

1. Hay'adda Fulinta ee Dawladda Puntland waxay ka kooban tahay Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-Xigeenka, Wasiirrada, Wasiir Ku-Xigeennada iyo dhammaan Saraakiisha Sare iyo shaqaalaha awooddooda toos u hoos yimaada.

2. Hay'adda Fulinta ee dawladda waxaa haga Madaxweynaha ama Madaxweyne Ku- Xigeenka haddii uu Madaxweynuhu maqan yahay.

Qodobka 74aad
GOLAHA XUKUUMADDA

Golaha Xukuumaddu waxa uu ka kooban yahay Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-Xigeenka, Wasiirrada iyo Wasiir Ku Xigeennada.

Qodobka 75aad
AWOODAHA IYO MAS'UULIYADAHA GOLAHA XUKUUMADDA

Golaha xukuumaddu wuxuu leeyahay mas'uuliyadaha soo socda:

1) Dejinta, xiriirinta iyo hirgelinta ***Hannaanka*** siyaasadeed ee ku saabsan amniga, horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada.

2) Kala Nidaaminta awoodaha hay'adda fulinta ee Dawladda.

3) Xukuumaddu waxa ay soo rogi kartaa canshuuro cusub ama dhimi kartaa kuwa hore u jiray, ayada oo la waafajinayo hadba baahida dalka, ***iyadoo laga anisixinayo Golaha Wakiillada***

4) ***Soo jeedinta iyo Oggolaanshaha*** miisaaniyad-sannadeedka Dawladda oo muujinaya dakhliga Xukummaddu filayso inuu soo galo iyo tafaasiisha kharashyada xukuumadda iyo hay'adaha kaloo dawliga ah ay filayaan in loo isticmaalo sannad-maaliyadeedkaas oo ay ku jiraan mushaharooyinka shaqaalaha Dawladda, waana in la horgeeyo Golaha Wakiillada, saddexda bilood ee sanadka ugu dambeeya gudahood.

5) Oggolaanshaha xeerka ku dhawaaqidda xaaladda degdegga ah, ***iyadoo laga ansixinayo Golaha Wakiillada 30 beri Gudahood***

6) Oggolaanshaha ***samaynta*** hay'ado madaxbannaan iyo kuwa ay Dawladdu qayb ka tahay, dabadeedna xeerkooda loo gudbiyo Golaha Wakillada.

7) Magacaabidda Xeer-Ilaaliyaha Guud, Hantidhawrka Guud, Garyaqaanka Guud iyo ***Guddoomiyaha Bangiga***, iyadoo ka dibna xasaanad loo weydiiyo Golaha Wakiillada

8) Inay ***ka baaraan degaan,*** go'aanna ka gaaraan dhammaan arrimaha uu Madaxweynuhu Golaha u soo bandhigo.

Qodobka 76aad
HABRAACA GOLAHA FULINTA

1. *Shuruudaha la doonayo inuu buuxiyo qof kasta oo loo magacaabayo Wasiir ama Wasiir ku-xigeen waxay la mid yihiin kuwa xubinta Golaha Wakiillada oo ay u raacdo heer aqooneed oo gaarsiisan ugu yaraan Jaamacad iyo waayo-aragnimo la xiriirta hawsha wasaaradda loo magacaabayo.*

2. *Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka, Wasiirada, Wasiir ku xigeenada iyo Dhammaan hawlwadeennada sarsare ee Dawladdu ma geli karaan ganacsi gaar ah inta ay xilka hayaan.*

3. *Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka, Wasiirada, Wasiir ku xigeennada iyo hawl wadeennada sarsare ee Xukuumaddu waa in ay hantidhowrka guud u caddeeyaan hantidooda bisha ugu horreysa ee ay xafiiska la wareegaan.*

4. *Dhammaan awaamiirta, wareegtooyinka iyo xeer-hoosaadyada ay Xukuumaddu soo saarto waa in ay saxiixaan Madaxweynaha ama Wasiirka hawshiisu ay la xiriirto..*

5. *Dhammaan Go'aannada Golaha Wasiirradu ku gaaraan aqlabiyad waa mas'uuliyad-wadareed..*

6. *Golaha Xukuumaddu waa inuu xil-wareejin u sii diyaariyaa Golaha ku xiga laba bilood ka hor dhammaadka muddada xil-hayntiisa.*

Qodobka 77aad
SHURUUDAHA DOORASHADA MADAXWEYNAHA & MADAXWEYNE KU XIGEENKA

1. *Muwaadin kasta oo Puntland ah waa u furan tahay in uu u tartamo Madaxweyne ama Madaxweyne Ku-Xigeen haddii uu buuxiyo shuruudaha xilka oo ah:-*

   (b) Inuu yahay muwaadin Puntland ah, Muslim ah, ku dhaqma diinta Islaamka, miyirkiisu dhan yahay, da'diisuna aanay ka yarayn afartan (40) sano, qabin xaas ajnabi ah inta uu xilka hayana guursan karin.

   (t) Inuu leeyahay tacliin sare, waayo aragnimo hogaamineed, aqoon la xiriirta dhaqanka iyo hiddaha Soomaaliyeed. dalkana ku sugnaa labadii sano ee ugu dambaysay.

   (j) Inaan xuquuqdiisa muwaadininimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shantii sano ee ugu dambeysay.

   (x) In uusan hore u gelin khiyaamo qaran ama ku xad gudbin xuquuqda bani'aadamka.

2. *Musharraxiinta jagada Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenku waxay ka imaan karaan Golaha Wakiillada iyo dadweynahaba.*

3. Haddii xubin ka mid ah Golaha Wakiillada loo doorto Madaxweyne ama Madaxweyne ku-xigeen wuxuu bannaynayaa xubinnimadii Golaha Wakiillada, waxaana beddelaya qofkii xubin- sugaha u ahaa.

Qodobka 78aad
MUDDADA XILKA

Muddada xilhaynta Madaxweynaha iyo Madaxweye ku-xigeenku waa shan sano (5), laga bilaabo maalinta natiijada Doorashada lagu dhawaaqo, labo jeer oo keli ah ayaana la soo dooran karaa.

Qodobka 79aad
AWOODAHA IYO MAS'UULIYADAHA MADAXWEYNAHA

1. Madaxweynuhu waa madaxa Dawladda iyo Guddoomiyaha Golaha Fulinta. waana astaanta midnimada dadka Puntland.

2. Madaxweynuhu wuxuu mas'uul ka yahay ilaalinta diinta Islaamka, Dastuurka, Difaaca dalka iyo Qawaaniinta kale ee Puntland.

3. Madaxweynuhu waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida.

4. Madaxweynuhu, isaga oo la tashanaya Madaxweyne ku-xigeenka wuxuu soo dhisayaa Xukuumadda 21 beri gudahood laga bilaabo marka la doorto. Madaxwynuhu wuxuu Xubnaha Xukuumaddiisa ka dhex xulan karaa Golaha Wakiillada iyo dadweynahaba.

5. Madaxweynuhu, isaga oo la tashanaya Madaxweyne Ku-Xigeenka, wuxuu awood u leeyahay in uu magacaabo ama xilka ka qaado Xubnaha Golaha Wasiirrada, madaxda hay'adaha madaxabannaan iyo madaxda kale ee Dastuurka ama shuruucda kale u oggol yihiin.

6. Madaxweynuhu wuxuu curiyaa ama oggolaadaa, si waafaqsan Dastuurka iyo shuruucda dalka, siyaasadda xukuumaddiisu fulinayso ee la xiriirta waaxyaha maamulka guud, fulinteedana ku kormeeraa iyadoo ay ujeedadu tahay in dadweynaha Puntland gaaraan horumar dhaqan-dhaqaale oo dhan kasta ah.

7. Madaxweynuhu wuxuu galaa wada-xaajoodyada la xiriira shuruudaha Dawladda Puntland uga qayb galeyso Jamhuuriyad Soomaaliyeed ee Federaal ah, wuxuuna la saxiixayaa Dawladda Federaalka ah heshiis, kaasoo u baahnaan doona in laga ansaxiyo Golayaasha Xukuumadda iyo Wakiillada.

8. Madaxweynuhu wuxuu amraa, horana u mariyaa xiriirka caalamiga ah ee Puntland, wuxuuna ka xaajoodaa dabadeedna saxiixaa heshiisyada caalamiga ah.

9. Madaxweynuhu wuxuu si rasmi ah u qaabilaa wufuudda ajnebiga ah ee Puntland soo booqda, wuxuuna u aqoonsadaa in ay marti dawladeed yihiin.

10. Madaxweynuhu wuxuu billado iyo shahaado sharafyo guddoonsiiyaa muwaadiniinta Puntland iyo kuwa ajnebiga ah ee mutaysta.

11. Wuxuu leeyahay fidinta saamaxaadda iyo cafiska dembiyada siyaasadda iyo kuwa kaleba. Marka uu helo soo jeedinta hay,adaha Garsoorka, marka laga reebo Qisaasta iyo Xudduuda shareecada Islaamku jidaysay.

12. Madaxweynuhu wuxuu furaa, hadalna ka jeediyaa kalfadhiyada Golaha Wakiillada.

13. Madaxweynuhu wuxuu soo saaraa xeer xaalad degdeg ah si uu uga hortago dhibaatooyinka ciribdambeed-xumadu ka dhalan karto, sida:

    (b) Musiibo dhacday, sida abaaro, duufaan, daadad, iwm.

    (t) Dagaal sokeeye ama dagaal ay Dawladda Puntland ku dhawaaqday, ama

    (j) Rabshado/kacdoon gudaha ah ee loola jeedo in lagu dumiyo jiritaanka Puntland.

14. Madaxweynuhu wuxuu soo saaraa xeerka xaaladda degdegga ah sodon (30) maalmood gudahood, isagoo horgeynaya Golaha Wakiillada si uu u ansixiyo, sida uu qabo qodobka 28-aad ee Dastuurku.

15. Madaxweynuhu wuxuu si rasmi ah ugu dhawaaqaa taariikhda Hay'adda Doorashadu u astaysay qabashada doorashada.

16. Madaxweynuhu wuxuu soo saaraa xeer qeexaya in la fuliyo shuruucda Golaha Wakiilladu gudbiyeen. Ma jiri karo xeer ka horimanaya sharci Golaha Wakiilladu gudbiyeen.

17. Madaxweynuhu wuxuu ku hawlgalayaa mas'uuliyadaha iyo awoodaha kale ee sharciga Puntland u ogolaanayo.

18. Madaxweynuhu markuu la tashado Golaha Xukuumada wuxuu magacaabaa Guddoomiyaha iyo garsoorayaasha maxkamada sare.

19. Madaxweynaha wuxuu magacaabaa Guddoomiyaha, Garsoorayaasha iyo Xeer Ilaalinta Maxkamadda Ciidamada Qalabka Sida.

Qodobka 80aad
AWOODAHA IYO MAS'UULIYADAHA MADAXWEYNE KU-XIGEENKA

1. ***Madaxweyne Ku-Xigeenku wuxuu qabtaa xilalka Madaxweynaha marka uu dalka ka maqan yahay, ama uusan si ku meelgaar ah xilkiisa u gudan karin.***

2. Madaxweyne Ku-Xigeenku wuxuu kala taliyaa Madaxweynaha magacaabidda iyo xil-ka-qaadista Wasiirrada, Wasiir Ku-Xigeennada iyo Saraakiisha sarsare ee Dawladda.

3. ***Madaxweyne Ku-Xigeenku wuxuu fuliyaa hawlaha Madaxweynuhu u wakiisho ee aan ka baxsanayn awooddiisa.***

4. Madaxweyne Ku-Xigeenka waxaa loo dhaarinayaa xilka Madaxweyninimo, haddii uu Madaxweynuhu geeriyoodo, iscasilo, xilka laga qaado ama ay la soo gudboonaato xaalad xil gudasho la'aan joogta ah, wuxuuna haynayaa inta ka harsan muddadii xilka Madaxweynaha.

5. Haddii ay dhacdo xaaladda ku xusan faqradda 4aad ee qodobkan, Golaha Wakiilladu waxa uu 30 maalmood gudahood ku soo dooranayaa Madaxweyne ku-xigeen cusub.

6. ***Haddii Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenku isku mar geeriyoodaan, is wada casilaan ama xilka laga wada qaado, waxaa xilkooda sii qabanaya Guddoomiyaha Golaha Wakiillada inta laga soo dooranayo Madaxweyne iyo Madaxweyne Ku-Xigeen cusub, muddo soddon (30) maalmood gudahood ah.***

Qodobka 81aad
EEDAYNTA IYO XIL KA QAADISTA MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU-XIGEENKA

1. Haddii Madaxweynaha ama Madaxweyne Ku-Xigeenka lagu eedeeyoku-xadgudub Dastuur, khiyaamo qaran iyo xil gudasho la'aan waxaa la marayaa habraaca soo socda:

   (b) Ugu yaraan waax (1/4) xubnaha Golaha Wakiillada ama Xeer Ilaaliyaha Guud waa inay bilaabaan habraaca eedeynta Madaxweynaha ama Madaxweyne Ku-Xigeenka, iyagoo Golaha Wakiillada u gudbinaya caddeymaha eedeynta,

   (t) ka doodida eedeynta Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka waa inay ogolaadaan ugu yaraan ½ +1 kala badh iyo hal tirada xubnaha Golaha.

   (j) Golaha Wakiilladu wuxuu ka baaraandegayaa eedeymaha la soo hordhigay, waxaana eedeysanaha la siinayaa fursad isdifaac.

   (x) Goluhu wuxuu u codeynayaa, isla markaana ogolaanayaa oo kaliya marka ay saddex meelood laba (2/3) ay si qarsoodi ugu codeyso xil-ka-qaadistooda.

2. Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenku dalka kama maqnaan karaan muddo ka badan lixdan (60) beri.

Qodobka 82aad

XILALKA WASIIRKA

1. Wasiirku waa mas'uulka ugu sarreeya wasaaradda loo magacaabay, siyaasad ***ahaan*** iyo ***hagidda*** maamulka.

2. Wasiirku wuxuu fuliyaa siyaasadda xukuumadda ee la xiriirta wasaraddiisa.

3. Wasiirka, isaga oo la tashanaya Wasiir ku-xigeenka wuxuu go'aamiyaa siyaasadda hawl-fulinta wasaaradda iyo shaqaalaheeda.

Qodobka 83aad

XILALKA WASIIR KU-XIGEENKA

1. Wasiir ku-xigeenku waxa uu qabanayaa dhammaan xilalka Wasiirka marka uu maqan yahay ama uusan si ku-meelgaar ah xilka u gudan karin.

2. Wasiir Ku-Xigeenka wuxuu kala taliyaa Wasiirka dhammaan waxqabadka wasaaradda.

3. Wasiir Ku-Xigeenku wuxuu fuliyaa hawlaha uu u cayimo Wasiirku oo aan ka baxsanayn mas'uuliyadda ***Wasiirka.***

Qodobka 84aad

WAKAALADAHA GAARKA AH

1. Golaha Xukuumaddu wuxuu abuuri karaa Wakaalado Gaar ah oo loo xilsaarayo hawlo cayiman.

2. Wakaaladaha Gaarka ah waxay yeelanayaan xeer u gaar ah oo laga ansaxiyo Golaha Wakiillada.

Qodobka 85aad

CIIDAMADA NABADGELYADA

1. Ciidamada Nabadgelyadu waxay u xilsaaran yihiin sugidda amniga gudaha iyo xuduudaha Dawladda Puntland, waxayna ka kooban yihiin:

   (a) Ciidanka Daraawiishta.

   (b) Ciidanka Booliska.

   (c) Ciidanka Nabadsugidda.

   (d) Ciidanka Asluubta.

2. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya dhismaha iyo waajibaadka ciidan kasta.

Qaybta 4aad
GARSOORKA

XUBINTA KOOWAAD

NIDAAMKA GARSOORKA

Qodobka 86aad

QAAB-DHISMEEDKA IYO MABAADIIDA

1. Hay'adda Garsoorka ee Puntland waxa ay ka kooban tahay:
   (b) Maxkamadda Sare.
   (t) Maxkamadda Dastuuriga.
   (j) Maxkamadaha Rafcaanka ee Gobollada
   (x) Maxkamadaha Darajada koowaad.
   (kh) Golaha Garsoorka.

2. Hay'adda Garsoorka ee Puntland oo kaliya ayaa xukun ridi karta, bixin karta amar fulin xukun dastuuri, madani, ciqaab, ganacsi, maamul, arrimo shaqaale iyo arrimo kale oo uu sharcigu jideeyay.

3. Garsoorku markuu hawlihiisa fulinayo, wuxuu xor ka yahay Golayaasha Xeer-Dejinta iyo Fulinta, waxaana haga **Shareecada Islaamka** Dastuurka iyo **Qawaaniinta** Dalka.

4. Qaab-dhismeedka, Laamaha, xuduudaha awoodaha iyo xilgudashada Garsoorka waxaa xadidaya sharci ay Xukuumaddu horgeyso Golaha Wakiillada.

5. Maxkamadaha Ciidamada waxay awood u leyihiin oo qura qaadista dambiyada ciidamadu galaan oo sharcigu qeexayo.

6. Garsoorayaashu waa in aynan qaban hawlo ka horimanaya garsoornimadooda.

7. Dhageysiga dacwooyinka waa ay u furantahay dadweynaha, hase yeeshee sharciga ama garsooruhu wuu go'aansan karaa si kale, isagoo ka eegaya arrimaha anshaxa, daaficidda da' yarta ama markhaatiyaasha, fayodhowrka ama ammaanka guud.

8. Xukun-dacwadeed lama ridi karo iyadoo aan dhinacyada is haya oo dhammi fursad u helin inay gartooda jeedsadaan, haddii aan sharcigu si kale u tilmamin.

9. Qofna ma burin karo, ma bedeli karo, ma diidi karo in uu u hogaansamo xukun maxkamadeed, haddii aysan xukunkaas bedelin ama tirtirin Maxkamad ka sarreysa.

10. Maxkamaddu waa in ay u fasirtaa eedeysanaha dambiga lagu ciqaabay.

11. ***Garsoorka Puntland wuxuu aqoonsan yahay Suluxa, Dhex-dhexaadinta iyo heshiiyada bulshada dhexdeeda oo xeerka ku dhisan***.

QODOBKA 87aad
GUDDIGA SARE EE MAAMULKA GARSOORKA

1) Guddiga sare ee Garsoorku waa kan ugu sareeya Maamulka Garsoorka iyo ilaalinta Madax bannaanidiisa.

2) Guddiga sare ee maamulka Garsoorku wuxuu ka kooban yahay:

(b) Guddoomiyaha Maxkamada Sare oo noqonaya Guddoomiyaha Guddiga sare ee Garsoorka.
(t) Xeer-Ilaaliyaha Guud
(j) saddex garsoore oo ka tirsan maxkamada sare.
(d) labo garyaqaan oo laga soo xulay dadweynaha oo ay soo xusho xukuumadu, Golaha Wakiilladuna ogolaado.

3) Marka Guddoomiyaha Maxkamada sare gudan kari waayo xilka guddoominta Guddiga sabab kasta ha ku timaadee, waxaa si ku meel gaar ah xilkii Guddoomiyanimadu ugu wareegayaa Garsoore ka tirsan Maxkamada sare oo darajo ahaan ku xiga Guddoomiyaha maxkamada sare..

4) Guddiga sare ee Maamulka garsoorka waxaa hawlihiisa nidaaminaya sharci gaar ah.

QODOBKA 88aad
AWOODAHA IYO XILALKA GOLAHA GARSOORKA

Goluhu wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Magacaabida, ruqsaynta, bedelidda, dalacsiinta, anshaxmarinta garsoorayaasha maxkamadaha rafcaanka iyo derajada koowaad iyo dhammaan shaqaalaha kale ee Hay'adda Garsoorka.
2. Diyaarinta halbeegyada sharci ee la xiriira taxanaha shaqo ee dhinaca maamulka hawlwadeennada garsoorka iyo u gudbinta halbeegyadaas Wasiirka Garsoorka si uu uga ansixiyo Golaha Xukuumadda.
3. Diyaarinta hindise sharci iyo wax ka bedelid sharciyo la xiriira howlaha iyo nidaamka Garsoorka iyo u gudbinta Wasiirka Garsoorka si uu u hordhigo Xukuumadda.
4. Samaynta iyo maamulidda xarumo tababarro garsoor si loo horumariyo heerka aqoonta iyo xirfadda garsoorayaasha iyo kaaliyeyaashooda, iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Garsoorka.
5. Shuruudaha uu Golaha Garsoorka u adeegsanayo shaqaalaynta garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah.

6. Go'aamadda Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka ee ku saabsan Magacaabidda, Ruqsaynta iyo Dalacsiinta Garsoorayaasha Maxkamadaha Rafcaanka, Maxkamaddaha Derejada Koowaad iyo Ku-xigeennada Xeer-ilaaliyaha Guud, waxay ku soo baxayaan Dekreeto Madaxweyne

XUBINTA LABAAD
MAXKAMADAHA

Qodobka 89aad
MAXKAMADDA SARE

1. Maxkamadda Sare waxay ku shaqaysaa go'aan wadareed, waxayna ka kooban tahay shan (5) xubnood oo kala ah: Guddoomiye, Guddoomiye Ku-Xigeen, iyo saddex (3) garsoore.

2. Maxkamadda Sare waxay yeelanaysaa laba (2) garsoore oo kayd ah oo uu Guddoomiyaha Maxkamaddu u yeeri karo in uu dacwadda la galo, marka garsoorayaasha qaarkood fasax galaan ama garsoore si gaar ah uga cudurdaarto inuu wax ka galo qaadista dacwadaha qaarkood. Garsoorayaasha kaydka ahi waa inay buuxiyaan isla shuruudaha Garsoorayaasha rasmiga ah, lana mariyo habka kuwa kale lagu doortay.

3. Garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo kuwa kaydka ahba waxaa soo sharraxaya Golaha xukuumadda, waxaana ansaxinaya Golaha Wakiillada.

4. Muddada xilhaynta xubnaha Maxmadda Sare ee rasmiga ah iyo kuwa kaydka ahba waa shan (5) sano, marka laga reebo doorashada koowaad oo noqonaysa sida soo socota:

   (b) Saddex garsoore oo rasmi ah iyo mid kayd ah waxaa la dooranayaa (5) shan sano doorashada ugu horraysa.

   (t) Labo garsoore oo rasmi ah iyo mid kayd ahna waxaa la dooranayaa afar (4) sano doorashada ugu horraysa.

   (j) Wixii ka dambeeya doorashada koowaad koox walba oo muddadoodu dhammaato, waxaa dib loo dooranayaa garsoorayaashii hore ama kuwa kale muddo shan (5) sano ah.

5. Xarunta Maxkamadda Sare waa xarunta Dawladda Puntland, hase ahaatee dacwadaha waxay ku qaadi kartaa meel kasta oo dalka ka mid ah.

6. Garsoorayaasha Maxkamadda Sare waxaa xilka lagaga qaadi karaa aqlabiyad haldheeri (1/2+1) ah xubnaha Golaha Wakiillada, iyadoo loo cuskanayo qodobka 100aad ee Dastuurka.

Qodobka 90aad
DOORASHADA GARSOORE MAXKAMADDA SARE

Qofka noqonaya Garsoore Maxkamadda Sare waxaa looga baahan yahay:

(b) I***nuu yahay muwaadin Puntland Muslim ah, gutana waajibaadka diiniga ah***

***(t) In aan xuquuqdiisa maxkamadi la laalin shantii* (5) sano ee ugu dambeysay.**

(j) In aan da'diisu ka yarayn (40).afartan sano

(x) In uu haysto shahaado culuunta sharciga oo uu ka qaatay Jaamacad la aqoonsan yahay.

(kh) Inuu leeyahay waaya-aragnimo garsoor oo aan ka yarayn ***shan (5)*** sano ama qareennimo ***lix (6)*** sano aan ka yareyn.

(d) Inuu yahay qof lagu yaqaan hufnaan iyo daacadnimo, aqoon iyo kartina u leh arrimaha sharciga.

Qodobka 91aad
NIDAAMKA GO'AAN QAADASHADA MAXKAMADDA SARE

1. Go'annada Maxkamadda Sare waxay ku ansaxaan aqlabiyadda Xubnaha Maxkamadda. Garsooraha ama Garsoorayaasha aan ogoleyn go'aanka la gaaray, waxay muujisan karaan codkooda diidmada ah.

2. Xoghayaha Maxkamadda Sare waa inuu la socodsiiyaa go'aannada maxkamadda dhinacyada ay khusayso.

Qodobka 92aad
AWOODAHA IYO XILALKA MAXKAMADDA SARE

1. Maxkamadda Sare waa darajada ugu sarraysa maxkamadaha, waxayna leedahay awood ku baahsan Puntland oo dhan.

2. Waxay Golaha Wakiillada u soo jeedisaa abuuridda maxkamado cusub.

3. Waxay horgeysaa Golaha Wakiillada mashruuc sharci ama wax ka beddelid shuruuc jirtay oo la xiriira maamulka Garsoorka.

4. Waxay xallisaa khilaafaadka u dhaxeeya Maxkamadaha, kuna saabsan xuduudahooda.

5. Waxay go'aan kama dambeys ah ka gaartaa dacwadaha ay xukumeen Maxkamadaha ka hooseeya, iyadoo aan lagu raalli galineyn dinacyada is-haya midkoodna.

6. Waxay xallisaa ismaandhaafyada sharciyeed oo ayan masuuliyiin kale sharciyan ugu xilsaarneen.

7. Waxay diyaarisaa habraacyada dacwadaha ka dhacaya dalka dibaddiisa iyo inay ogolaato habraaca lagu fulinayo dacwad ama xarig dembiile dal kale lagaga soo xukumay.

8. Waxay go'aan ka gaartaa dhammaan codsiyada isu-gacan gelinta dembiilayaasha.

9. Waxay hubisaa sida ay Maxkamadaha hoose u maamulayaan garsoorka, wana in ay qaadaa tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo helo in ay

garsoorayaashu wax u xukumaan si ay ku dheehantahay karti, hufnaan iyo caddaalad.

10. Waxay xukuntaa Saraakiisha Dawladda sida shuruucdu jideeneyso.

11. Awoodaha iyo xilalka Maxkamadda Sare waxaa ka mid ah awoodaha iyo xilalka kale ee uu sharcigu banneynayo.

Qodobka 93aad
MAXKAMADAHA RAFCAANKA

1. Xarumaha Maxkamadaha Rafcaanku waa magaalo-madaxyada Gobollada.

2. Maxkamadaha Rafcaanku waxa ay qaadaan dacwadaha rafcaanka laga soo qaatay ee xukunnadoodu ka soo dhamaadeen maxkamadaha derejada koowaad.

3. Awoodaha maxkamadda rafcaanku waxa ay ku egtahay gobolkeeda.

4. Maxkamad kasta ee Rafcaan waa in ay yeelataa ugu yaraan saddex (3) garsoore.

5. Shuruudaha laga doonayo garsoorayaasha loo qaadanayo Maxkamadda Rafcaanka waxa ay la mid yihiin kuwa Garsoorayaasha Maxkamadda Sare, sida ku cad qodobka ***90aad*** ee Dastuurka. Garsoorayaashaasi waa in ay haystaan shahaado qaanuun ee la aqoonsan yahay ama in ay ***aqoon*** ballaaran u leeyihiin Shareecada Islaamka.

Qodobka 94aad
MAXKAMADDA DEREJADA KOOWAAD

1. Maxkamadaha derejada koowaad waa Maxkamadaha ay ka bilawdaan dacwaduhu nooc kasta ha ahaadeene, marka laga reebo dacwadaha sharcigu u jideeyay Maxkamadaha darajooyinka sare ee Garsoorka.

2. Tirada Garsoorayaasha Maxkamadaha derejada koowaad waxaa qeexaya Xeerka Nidaamka Garsoorka.

Qodobka 95aad
MAXKAMADAHA CIIDAMADA

1) Maxkamadaha ciidamadu waxay gaar u yihiin qaadista dembiyada ay galaan xubnaha ciidamada oo keli ah iyo ciddii isu ekeysiisa.
2) Maxkamadaha Ciidamada iyo xeer-ilaaliyaashooda waxaa nidaamiya xeer gaar ah.

Qodobka 96aad
MAXKAMADDA DASTUURIGA

1. Dawladda Puntland waxay yeelaneysaa Maxkamad Dastuuriga ah, garsoorayaasheeduna waxa ay ka koobnaanayaan garsoorayaasha Maxkamadda Sare oo lagu kordhiyo afar (4) garsoore oo bulshada laga soo dhex xulay.

2. Afarta (4) garsoore ee bulshada laga soo xulayo waxaa la magacaabayaa soddon beri (30) gudahood, markii dhismaha Maxkamadda ***Sare*** lagu dhawaaqo.

3. Afarta garsoore ee bulshada laga soo xulayo, labo ka mid ah waxaa dooranaya Golaha Wakiillada, labada kalena waxaa soo xulaya Golaha Xukuumadda waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada.

4. Afarta xubnood ee Maxkamadda Dastuuriga ah ee laga soo xulay bulshada waxay dhammaan xuquuqda kala mid yihiin garsoorayaasha Maxkamadda Sare.

5. Guddoomiyaha Maxkamadda sare ayaa noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah.

6. Maxkamaddu waxa ay u hoggaansamaysaa sharciga oo keli ah, maammul ahaan iyo garsoor ahaanba.

7. Xoghayaha Maxkamadda sare ayaa noqonayaa Xoghayaha Maxkamadda Dastuuriga ah.

8. Haddii jago-garsoore ama ka badani ka bannaanaato Maxkamadda Dastuuriga, sabab kasta ha ku timaadee, waa in lagu buuxiyaa afartan iyo shan (45) maalmood gudahood.

9. Xarunta Maxkamadda Dastuuriga waa caasimadda Puntland.

10. Xukuumadda ayaa diyaarineysa xeer gaar ah oo lagu qeexayo dhismaha, habka iyo awoodaha Maxkamadda Dastuuriga, waxaana ansaxinaya Golaha Wakiillada.***dhismaheeda ka hor***.

Qodobka 97aad
AWOODAHA IYO XILALKA MAXKAMADDA DASTUURIGA

1. Maxkamadda Dastuuriga ahi waxay awood u leedahay inay buriso ***qaanuun*** kasta, xeer hoosaad ama xeer-fulineed Golaha Fulinta gebi ahaan ama qaybo ka mid ah, sababo la xiriira inuu Dastuurka khilaafsan yahay. Muwaadin kasta wuxuu Maxkamadda weydiisan karaa in ay sidaas yeesho, isagoo arjigiisa ku xusaya sababaha cabashadiisa.

2. Go'aan ka gaarista cabasho muwaadin oo la xiriirta tacaddi loo geystey xuquuqdiisa dastuuriga ah.

3. Maxkamadda Dastuuriga waxay go'annadeeda ***waafajisaa*** Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo ***Xeerarka kale.***

4. Maxkamadda Dastuuriga waa in ay ku xalisaa khilaafaadka u dhexeeya hay'adaha dawliga ah sida hadba awoodahooda dastuuriga iyo xilalkoodu kala yihiin.

5. Maxkamadda Dastuuriga waxay ka siisaa ***talo sharci***, markii uu Golaha Wakiillada weydiisto, sida mashruuc sharci ah oo ay ka doodayaan uu u waafaqsanyahay Dastuurka.

6. Maxkamadda Dastuuriga ah ayaa ilaalinaysa inaan qofna xaquuqdiisa lagu xad gudbin, ***Xeer*** gaar ah ayaana qeexaya sida Maxkamadda Dastuuriga ay u gudanayso xilkaas.

Qodobka 98aad

GO'AAN QAADASHADA MAXKAMADDA DASTUURIGA

1. Maxkamadda Dastuuriga waxay go'aannadeedu ku gaartaa aqlabiyad cod hal-dheeri ah.

2. Go'aannada Maxkamadda Dastuurga waa in la Diiwaangeliyo, Dadweynaha lala socodsiiyo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

3. Xoghayaha Maxkamaddu waa inuu go'aannada Maxkamadda ogeysiiyaa dhinacyada ay khusayso.

Qodobka 99aad

SHURUUDAHA XULIDDA GARSOORAYAASHA

MAXKAMADDA DASTUURIGA

Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuuriga ah ee aan ka tirsanyn Maxkamadda sare waa inay buuxiyaan shuruudaha ku xusan qodobka ***90aad*** ee Dastuurka.

Qodobka 100aad

LUMINTA XUBINNIMADA MAXKAMADDA DASTUURIGA

Xubinnimada Maxkamadda Dastuuriga waxaa lagu waayi karaa marka ay sugnaato mid ka mid ah sababaha hoos ku qoran:

(b) Haddii ay lumiso shuruudihii lagu soo doortay mid ka mid ah.

(t) Geeriyooto ama ay ku dhacdo jirro ay la gudan waydo xilkeeda.

(j) Istiqaalo keento lagana aqbalo.

(x) Ku xad gudubto ***Shareecda Islaamka,*** Dastuurka iyo qawaaniinta Dalka.

(kh) Maxkamadi ku xukunto fal dambiyeed ***culus.***

Qaybta 5aad

HEY'ADAHA KALE EE DAWLLADDA EE MUHIIMKA AH

Xubinta 1aad
XEER-ILAALINTA GUUD

Qodobka 101aad
XEER-ILAALIYAHA GUUD

1. ***Xafiiska xeer-ilaalinta guud waa qayb ka mid ah Garsoorka Puntland.***
2. ***Xafiiska xeer-ilaalintu wuxuu u hogaansanyahay sharciga oo kali ah***
3. ***Xarunta xeer ilaaliyaha guud waa caasimada Puntland***
4. ***Awoodda xeer-ilaaliayaha guud waxay ku fidsan tahay Dalka Puntland oo dhan***
5. ***Xafiiska xeer-ilaaliyaha guud wuxu ka kooban yahay:***
    a) ***Xeer-ilaaliyaha guud***
    b) ***Ku-xigeenadiisa oo Gobolkiiba hal ah***
6. ***ku-xigeenada xeer-ilaaliyaha Guud waxay la mid yihiin xagga mansabka Garsoorayaasha Maxkamadaha Rafcaanka,waxaana magacaabidooda iyo xil ka qaadistooda awood u leh Guddiga sare ee Maamulka Garsoorka.***
7. ***ku-xigeennada xeer-ilaaliyaha guud waxay leeyihiin xuquuq iyo xasaanad la mid ah tan Garsoorayaasha Maxkamadaha.***

Qodobka 102[aad]
SHURUUDIHIISA & MAGACAABIDDA XEER-ILAALIYAHA GUUD

1. ***Golaha Xukuumada ayaa soo jeedinaya magacaabidda Xeer-Ilaaliyaha Guud waxayana horgeynayaan Golaha Wakiillada si uu u ansixiyo.***

2. ***Qofka loo magacaabayo Xeer-Ilaaliye Guud waa inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:***

    (a) Inuu yahay muwaaddin Puntland.

    (b) In ayan da'diisu ka yarayan 40 sano.

    (c) Inuu haysto shahaado Jaamacadeed ee culuumta sharciga, isla markaasna uu leeyahay waaya ara'gnimo Garsoore oo aan ka yaryan shan sanno(5) ama mid Qareenimo oo aan ka yarayn lix (6) sano.

    (d) Waa inuu leeyahay dhaqan wanagsan iyo karti xil gudasho oo hawshiisa la xiriirta.

3. Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxuu leeyahay awood ku baahsan Puntland oo dhan.

Qodobka 103aad
AWOODAHA IYO XILALKA XEER-ILAALIYAHA GUUD

2. . Xeer-ilaaliyaha Guud wuxuu awood u leeyahay in uu dacwad ku soo oogo kuna mudaco saraakiisha sare ee Dawladda Maxkamadda horteeda.
2. . Xafiiska xeer-ilaaliyaha Guud wuxuu u xilsaaran yahay:
a) ilaalinta ku dhaqanka sharciyada iyo ka hortaga dhaqan xumada Dalka Puntland
b) baarista, oogidda iyo ku muddaca dembiilayaasha Maxkamadaha hortooda
c) kormeerida xabsiyada iyo xarumaha dhaqan celinta
d) ilaalinta iyo difaaca xuquuqada agoonta, Dadka dhimirkoodu dhiman yahay iyo cid kasta oo u baahan daryeel sharci
3. gudashada xilalka iyo waajibaadka ay siiyaan sharciyada gaarka ah

Qodobka 104aad
XIL KA QAADISTA XEER ILAALIYAHA GUUD IYO KU-XIGEENKIISA

1. Waxaa Xeer-ilaaliya Guud xilka looga qaadida karaa si sharci ah oo kali ah.

2. Sida isagoo dambi faraha kula jira lagu qabto, kuna dhaco Xukun ciqaabeed culus oo kama danbays ah Maxkamadina ku Xukuntay.

3. Arrimaha labada faqradood ee kor xusan markay dhacaan waxaa xilka qaadida soo jeedinaya Golaha Xukuumada una gudbinaya Golaha Wakiillada si ay u ogolaadaan qabashada iyo dacwad ku qaadista Xeer-ilaaliyaha Guud.

Xubinta Labaad
HANTIDHAWRKA GUUD

Qodobka 105aad
XAFIISKA HANTI DHAWRKA GUUD

1. Xafiiska Hantidhawrka Guud waa hay'ad madaxbannaan wuxuuna u hoggaansamaa sharciga oo keliya.

2. Xarunta Hantidhawrka Guud waa Caasimadda Puntland, wuxuuna leeyahay awood ku baahsan Puntland oo dhan.

3. Madaxa xafiiska Hantidhawrka Guud waxaa magacaabaya Golaha Xukuumadda muddo shan (5) sano ah, waxaana xilka lagaga qaadi karaa sababo sharciga ku cad oo kaliya. Golaha Wakiilada ayaa ansaxinaya magacaabistiisa iyo ***xilkaqaadistiisa.***.

4. Qofka noqonaya Madaxa Xafiiska Hantidhawrka Guud waa inuu yahay muwaaddin Puntland ah oo aynan da'diisu ka yarayn afartan sano (40), ***haystana Shahaado Jaamacadeed,*** isla markaasna aqoon u leh xisaabaadka Dawladda iyo

guud ahaanba Xisaabaadka, waana inay u weheliso waaya-aragnimo la xiriirta isla hawshaas oo aan ka yarayn shan (5) sano.

5. Marka laga reebo Madaxa Xafiiska Hanti Dhawrka Guud dhammaan shaqaalaha kale ee xafiiska waxaa lagu qaadanayaa si waafaqsan sharciga shaqaalaha Dawladda ee Puntland.

6. Qaab-dhismeedka iyo habraacyada Xafiiska Hantidhawrka Guud Sharci gaar ah ayaa qeexaya.

Qodobka 106aad
AWOODAHA IYO XILALKA HANTI DHAWRKA GUUD

Awoodaha iyo xilalka Hantidhawrka Guud:

1. La Dagaallanka musuqmaasuqa heer kasta oo maamulka Dawladda dhexdeeda ka jira.

2. Hubinta in dhammaan kharashyada xisaabaadka dawladda ee ay galaan dhammaan hay'adaha dawladdu ay ku baxaan si sharci ah oo waafaqsan miisaaniyadda Dawladda.

3. Dabagalka munaasibnimada waxqabadyada Dawladda ee kallifa kharash bixin ka soo jeedda xisaabaadka Dawladda.

4. Baaritaanka hay'adaha Dawladda, dawaladaha hoose, wakaaladaha Madaxa-bannaan, shirkadaha wadaagga ah ee dawladdu qayb ka tahay iyo meel kasta oo lagu maamulo hanti dawladeed, si waafaqsan habraacyada shuruucdaa maaliyadeed iyo xisaabaadka Dawladda.

5. Go'aan ka gaaridda mas'uul kasta oo si khaldan u maamula maaliyad dawladeed iyo go'aaminta ganaax u dhigma heerka takrifalka mas'uulkaasi galay. Haddii baaritaanka uu ka soo baxo fal-dambiyeed, Hantidhawrka Guud wuxuu kiiskaas oo ay la socdaan qoraallada ka marag kacaya u gudbinayaa Xeer-Ilaalinta Guud si dacwad loogu oogo.

6. Inuu hay'ad walba oo dawladeed weydiisto ama kala wareego dokumentiyada uu u baahan yahay marka uu baaritaan ku samaynayo inay jirto xatooyo ama ku takrifal hanti dadweyne si uu uga baaraandego.

7. Inuu sannad walba u gudbiyo Golaha Wakiillada warbixin ku aadan xisaab-xirka miisaaniyadda Dawladda ee sanadkii la soo dhaafay.

8. Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu awood u leeyahay soo saaridda awaamir iyo qaab habraacyo ku aaddan gudashada xilalka hantidhawrka guud.

9. Gudashada awoodaha iyo xilalka kale ee ay faraan sharciyada Puntland.

Qodobka 107aad

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD

1. Xafiiska Garyaqaanka Guud waa hay'ad gaar ah oo leh madaxbannaani shaqo lana xiriirsan Madaxtooyada Dawladda Puntland, wuxuuna ka koobmaa:

(b). Garyaqaanka Guud.

(t). Ku- Xigeennada Garyaqaanka Guud.

2. Xarunta Garyaqaanka Guud waa magaalo madaxda Dawladda Puntland.

3. Garyaqaanka Guud xuduudiisa awoodeed waa Puntland oo dhan.

4. Garyaqaanka Guud wuxuu hay'adaha Dawladda ka difaacaa Maxkamadaha hortooda, markay wax dacweynayaan iyo markii ayaga la dacweynayaba.

5. Garyaqaanka Guuud wuxuu talo sharci siiyaa Madaxtooyada iyo Golaha Wakiillada, markay uga baahdaan.

6. Garyaqaanka Guud wuxuu Madaxweynaha ka saxiixaa ***Xeerarka Golaha Wakiilladu ansixiyo kuna*** soo saaraa Faatinta Rasmigas ah ee Dawladda si loogu dhaqmo.

7. Xafiiska Garyaqaanka Guud waa hay'adda keydisa lagana heli karo dhammaan qawaaniinta Puntland ka soo baxda.

8. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya qaab-dhismeedka Xafiiska Garyaqaanka Guud iyuo Shuruudaha looga baahan yahay hawlwadeenadiisa.

Qodobka 108aad
BANKIGA DHEXE

1. Bankiga Dhexe waa hay'ad Dawladeed Madaxbannaan, wuxuuna u xilsaaran yahay:

(b) Hirgelinta siyaasadda lacageed ee ***Dawladda***

(t) Daabicidda lacagta.

(j) ***keydinta lacagaha iyo qiimaleyda kale.***

(x) Oggolaanshaha shirkadaha maaliyadeed ee gaarka loo leeyahay.

(kh) Kormeeridda shirkadaha maaliyadeed ee gaarka ah iyo kuwa guud ee Puntland ka hawlgala.

2. . Bankiga Dhexe waxaa hawlihiisa haga Guddi Maamul oo ka kooban toddoba (7) xubnood oo kala ah:

(b) Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.

(t) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda.

(j) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga.

(x) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha.

(kh) Saddex xubnood oo ay magacowdo Rugta Ganacsiga; iyo

(e) Xoghaye aan cod lahayn oo noqonaya Agaasimaha Guud ee Bankiga Dhexe.

3 Guddoomiyaha Bankiga Dhexe waxaa xilka u magacaaba, muddo shan (5) sano ah Xukuumadda, iyada ayaana sababaha sharcigu tilmaamayo oo kaliya ku ruqseyn karta, Golaha Wakiillada ayaa ansixiya magacaabistiisa iyo ruqseyntiisaba.

4. Qaab-dhismeedka iyo nidaamka uu ku hawl-galo Bankiga Dhaxe, waxaa qeexaya xeer gaar ah oo Golaha Wakiilladu ansixiyo.

Qodobka 109aad
AQOONSIGA XEER-DHAQAMEEDKA

1. Dastuurku wuxuu Aqoonsanyahay Xeer-Dhaqameedka aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.

2. Isimada la aqoonsan yahay waa heerka ugu sarreeya hoggaamiye dhaqameedka.

3. Si loo ilaaliyo sharafta iyo dhex-dhexaadnimada hogaamiye dhaqameedyada, waxaa reebban in ay ka qayb qaataan ururo iyo xisbiyo siyaasadeed.

4. Wixii muran iyo ismaandhaaf ah oo ka dhex dhaca beelaha, khatarna galin kara nabadgalyada beelaha, hogaamiye dhaqameedyada waxaa loogu yeerayaa in ay talo ka soo jeediyaan ama ay u helaan xal nabadeed.

5. Go'aannada dib-u-heshiisiinta, dhexdhexaadinta, iyo heshiisyada xallinta khilaafaadka ay guddoomiyaan hoggaamiye dhaqameedyadu, iyaga oo adeegsanaya xeerarka hab-dhaqameedka, dhamman hay'adaha Dawladda waa inay aqoonsadaan gacanna ku siiyaan fulinta go'aannada ay gaaraan.

6. Marka hoggaamiye dhaqameedyadu gaaraan go'aan ku saabsan xallinta khilaafaadka beelaha dhexdooda, waa in laga diiwaan geliyaa maxkamadda derejada koowaad ee degmada dhibaatadu ka dhacday, maxkamadduna waa inay la socotaa fulinta go'aankaas.

Qodobka 110aad

GUDDIGA CULIMADA DIINTA

Xukuumadda Puntland waxay magacaabeysaa Guddi Culimo ee diinta Islaamka:

1. Guddiga wuxuu ka koobnaanayaa sagaal (9) xubnood oo caan ku ah aqoonta . Shareecada Islaamka.

2. Guddiga waajibaadkiisu waxa ay noqonayaan in ay Dawladda kala taliyaan arrin kasta oo khuseysa Shareecada Islaamka, gaar ahaan marka looga baahdo iswaafajinta Shareecada Islaamka iyo Xeerarka Puntland.

3.Waxaa kaloo Guddiga Culimada lagala tashanayaa magacaabista garsoorayaal Shareecada Islaamka ee ka hawlgala Maxkamadaha kala duwan ee Puntland, hadba sidii loogu baahdo.

4. In ay caddeyn ka bixiyaan masaa'isha diiniga ah ee abuurma.

5. Si loo ilaaliyo dhowrsoonaanta Xubnaha Guddiga ee culimada waa in aanay xisbiyo siyaasadeed ka mid noqon inta ay xilka hayaan.

6. Xeer gaar ah ayaa hagaya hawlaha xubnaha guddiga culimada.

Xubinta Saddexaad

HAY'ADDA DOORASHADA

Qodobka 111aad
GUDDIGA DOORASHADA

1. ***Guddiga Doorashada Puntland waa hay'ad madaxbannaan, waxayna u hoggaansamaysaa sharciga oo keliya, waxayna xilkeeda u gudaneysaa si waafaqsan xeerarka & Qawaaniinta Doorashada***.

2. Waa hay'adda ugu sarraysa arrimaha doorashooyinka ee dalka oo go'aannadeedu aysan burin karin hay'ad kaloo dawli ah, marka laga reebo Maxkamadda Dastuuriga ah.

3. Guddiga Doorashada ee Puntland wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood oo la dooranayo muddo lix (6) sano ah, dibna loo soo dooran karo.

Qodobka 112aad
NIDAAMKA DOORASHADA GUDDIGA

1. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ayaa saddex bilood ka hor ku dhawaaqaya wakhtiga loo muddeeyay ansaxinta Xubnaha Guddiga Doorashada, waxaana loo soo kala magacaabayaa, sida soo socota:

(b) Saddexda Xisbi mid waliba hal (1) xubin ayuu soo magacaabayaa.

(t) ***Madaxweynaha wuxuu magacaabayaa saddex (3) xubnood.***

(j) ***Golaha Wakiilladu wuxuu magacaabayaa saddex (3) xubnood,***

(x) Golaha Wakiillada wuxuu ansaxinayaa xubnaha ay soo kala magacaabeen Madaxweynaha, Golaha Wakillada iyo Xisbiyada. Haddii xubin ka mid ahi Goluhu ansaxin waayo, wuxuu Guddoomiyha Golaha Wakiillada u qorayaa in ciddii soo magacowday ay ku soo badasho mudoo shan iyo toban (15) beri gudahood. Xubintii muddadaas lagu soo magacaabi waayo halkeedii waa ay bannanaanaysaa ilaa laga soo magacaabayo.

2. Habka waayista ama xil-ka-qaadista xubinta Guddiga Doorashada wuxuu la mid yahay kan xubinta Maxkamadda Dastuurka, sida ku cad qodobka ***100***^{aad}.

Qodobka 113^{aad}
AWOODAHA IYO XILALKA GUDDIGA DOORASHADA

1. Guddiga Doorashada Puntland wuxuu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:

b) Fulinta iyo maamulidda aftida iyo habka doorashada sida Dastuurkani qabo.

t) Ku dhaqmidda awoodaha arrimaha doorashada, xallinta khilaafaadka, go'aaminta xuquuqda iyo ***Ganaaxa*** qof kasta oo ku xadgudba xeerka doorashada.

j) U oggolaanshaha xisbiyada siyaasadda, kormeeridda sharcinnimada hawlgalladooda iyo go'aan ka gaaridda is-qabadyada xisbiyada dhexdooda ah, markii qof ama koox xisbi ka mid ahi ay codsadaan in guddigu soo faragaliyo arrimaha xisbi dhexdiisa ka taagan.

x) Mamulidda qaababka lagama maarmaanka u ah gudashada xilalka Guddiga Doorashada iyo habraacyada hirgelinta doorashooyinka.

2.Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya howlaha iyo waajibaadka Guddiga doorashada.

Qodobka 114^{aad}
WADA SHAQAYNTA GUDDIGA DOORASHADA
IYO
XISBIYADA SIYAASADEED

1. Dhammaan xisbiyada siyaasadeed ee ka qaybgelaya tartanka doorashooyinka waxay xaq u leeyihiin inay la socdaan, isla markaana ay kormeeraan dhammaan tallaabooyinka habka doorashooyinka. Sharciga ayaa qeexi doona qaabka iyo xadka ka qaybgalka xisbiyada ee arrintaas.

2. Xisbiyada siyaasaddu waxay xaq u leeyihiin inay goob joogayaal ka ahaadaan dhammaan laamaha Guddiga Doorashada ee heer qaran, gobol, degmo iyo goobaha cod bixinta. Sidoo kale xisbiyadu waa inay goob joog ka ahaadaan soo xeraynta sanduuqyada codbixinta iyo tirinta codadka.

3. Guddiga Doorashada Puntland waa inuu hubiyo inaan shakhsiyaad isku siyaasad ahi yeelan aqlabiyadda gacan ku haynta maamulidda hawlaha doorashooyinka.

4. Sharciga ayaa nidaaminaya qaabka ololaha axsaabta iyo musharixiinta, waana in uu sameeyaa xadiga tabarrucaadka la siin karo iyo tirada lacagta lagu kharashgareenayo doorashada.

5. Dhammaan Xisbiyada siyasadda ee doorashooyinka ka qaybgelaya waa inay fursad siman u leeyihiin warbaahinta Dawladda marka lagu jiro ololayaasha doorashooyinka.

6. Guddiga Doorashooyinka Puntland ayaa u xilsaaran hubinta dhaqangelidda wada shaqaynta ku tilmaaman faqradaha qodobkan.

7. Inta laga gaarayo aburitaanka Guddiga Doorashada Puntland ee rasmiga ah, waxaa jiraya Guddiga Doorashada Puntland ee ku meelgaarka oo ka kooobnaanaya 9 xubnood sida ku cad lifaaqa 1aad ee Dastuurkan.

Xubinta Afaraad
DIFAACA XUQUUQDA AADANAHA

Qodobka 115aad
XAFIISKA DIFAACA IYO TAABBAGELINTA XUQUUQDA AADANAHA

1. Xafiiska Difaaca iyo Taabbagelinta xuquuqda aadanuhu wuxuu ka kooban yhay:
   (a) Difaacaha Xuquuqda Aadanaha.
   (b) Wakiillada gobollada ee Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanaha.
   (c) Hawlwadeennada Xafiiska Difaaca Xuquuqda Aadanaha.
2. Xarunta Xafiiska Difaacaha Xuquuqda Aadanahu waa caasimadda Puntland.
3. Difaacaha Xuquuqda Aadanuhu wuxuu leeyahay awood xilgudasho oo heer Puntland ah.

Qodobka 116aad
MAGACAABIDDA DIFAACAHA

1. Golaha Xukuumadda ayaa soo gudbinaya liiska musharaxiinta u tartamaya jagada difaacaha Xuquuqda Aadanaha***, Golaha Wakiilladuna waxay ku dooranayaan habka Doorashada Golaha Wakiillada..***

2. Qofka loo dooranayo Difaacaha Xuquuqda Aadanaha waa inuu buuxiyo shurrudaha soo socda:
   (b) ***Waa inuu yahay Muslim ahna muwaadin Puntland ah.***
   (t) Waa inayn da'diisu ka yarayan afartan (40) sano.
   (j) Waa inuu leeyahay aqoon iyo waayo-aragnimo la xiriirta Xuquuqda Aadanaha.
   (x) Waa inuu leeyahay anshax wanaagsan, dhowrsoonaan iyo karti xilgudasho.
3. Muddada xilhaynta Difaacaha Xuquuqda Aadanahu waa shan sano dibna waa loo soo dooran karaa.

Qodobka 117aad
AWOODAHA IYO XILALKA DIFAACAHA XUQUUQDA AADANAHA

Awoodaha iyo xilalka Difaacaha Xuquuqda Aadanuhu waa:

1. Ka hortegidda xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha, isagoo talabixin siinaya hay'adaha waddaniga ay arrintu khuseyso.
2. Ku wacyi galinta dadweynaha iyo masuuliyiinta dawladda muhimadda ay leedahay dhowrista Xuquuqda Aadanaha ee ku cad Dastuurka iyo sharciyada Puntland, isla markaasna ku xusan Axdiyada iyo heshiisyada caalamiga ah.

3. Inuu daafaco xuquuqda aadanaha ee Dastuurka iyo shuruucda kale ay qeexayaan.

4. Inuu baaro cabashooyinka ay muwadiniinta ama ururada Bulshada ka sheeganayaan xuquuqdooda bini'aadanimo, una gaarsiiyo hay'adaha dawliga ah & ***kuwa wadaniga ah*** natiijada baaristiisa, isagoo raacinaya talo soo jeedintiisa la xiriirta damanaad qaadka xuquuqda aadanaha***.***

5. Inuu taageero dadka lagu sameeyo xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha ka dhanka ah uuna ka difaaco maxkamadda horteeda ama si guud.

6. Magacaabidda guddiyo gaar ah oo gacan ka siiya gudashada xilkiisa.

7. Kormeeridda goob kasta oo lagu sameeyo ama la tuhunsan yahay in lagu gaboodfalo Xuquuqda Aadanaha.

8. U ololaynta dib u habeynta sharciyada iyo hab-dhaqanka maamulka si kor loogu qaado dhawrista iyo qaddarinta Xuquuqda Aadanaha.

9. Soo saarista warbixin sanadeed la xiriirta xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Puntland.

10. U bandhigidda Golaha Xukuumadda talooyinka ku aaddan mashruuc sharci oo khuseeya Xuquuqda Aadanaha.

11. Gudashada xilalka kale ee sharciyada Puntland siiyaan xafiiskaas.

Qodobka 118aad
XIL KA QAADISTA DIFAACAHA XUQUUQDA AADANAHA

Difaacaha Xuquuqda Aadanaha waxaa xilka lagaga qaadi karaa codbixin saddex meelood labo (2/3) xubnaha Golaha Wakiillada marka ay sugnaato mid ka mid ah sababaha ku cad qodobka ***100-aad*** ee Dastuurka.

Qaybta 6aad
MAAMULKA GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

Xubinta Koowaad
MAAMULKA GOBOLLADA

Qodobka 119aad
BAAHINTA MAAMULKA GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA

1. Puntland waxay ku dhaqmaysaa hannaanka mabaadiida baahinta maamulka.

2. Si loo hirgeliyo baahinta maamulka Dawladda, dalku wuxuu u qaybsan yahay gobollo iyo degmooyin.

3. Xukuumadda ayaa mas'uul ka ah dib-u-habeynta iyo kala xadaynta gobollada iyo degmooyinka.

4. Nidaamka baahinta xukunka waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah oo Golaha Wakiilladu meelmariyo.

5. Kala xadaynta awoodaha maamul iyo cashuureed ee Dowladda Dhexe, Gobollada iyo Degmooyinka waxaa lagu qeexayaa xeer gaar ah.

Xubinta 2aad

MAAMULKA GOBOLLADA

Qodobka 120aad
AWOODAHA IYO XILALKA GUDDOOMIYAHA GOBOLKA

1. ***Xukumaddu waxa ay gobol kasta u magacaabeysaa Guddoomiye Gobol & Guddoomiye ku xigeenno.***

2. Awoodaha iyo Xilalka Gudoomiyaha Gobolka waxa ay yihiin:

(b) Waa madaxa u sareeya laamaha Dowladda ee Gobolka, wuxuuna guddoomiyaa shirarka guddiyada horumarinta iyo nabadgalyada ee gobolka.

(t) Wuxuu kormeeraa adeegyada iyo hawlgallada Xukuumadda ee gobolkiisa.

(j) Wuxuu guddoomiyaa kulannada ay isugu yimaadaan guddiyada joogtada ah ee Golayaasha Degmooyinka.

(x) Guddoomiyaha Gobolku waa isku xiraha Maamulka Dhexe ee Puntland iyo maamulada degmooyinka ee gobolkiisa.

Qodobka 121aad
SHURUUDAHA MAGACAABISTA GUDDOOMIYE GOBOL & GUDDOMIYE KU XIGEEN.

Qofka noqonaya Guddoomiye Gobol waa inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:

(b) Waa inuu yahay muwaaddin Puntland ah.

(t) Waa in aan da'diisu ka yarayn soddon (30) sano.

(j) Waa in aan xuquuqdiisa muwaaddinnimo la laalin shantii (5) sano ee ugu dambeysay.

(x) Waa in uu leeyahay aqoon sare iyo waayo-aragnimo maamul.

(kh) Waa inuu xoogagaal u yahay duruufaha iyo dhibaatooyinka Gobolka.

Xubinta Labaad
MAAMULKA DEGMOOYINKA

Qodobka 122aad
GOLAYAASHA DEGAANKA

1. Gobol waliba maamul ahaan wuxuu u qaybsamayaa degmooyin. Sharci u gaar ah ayaa goynaya tirada, magacyada iyo xuduudaha degmooyinka, derejooyinka ay

kala yeelanayaan oo ku xirnaanaysa tirada dadka ku nool iyo baaxadda degmo kasta.

2. Degmo kastaa waxay yeelaneysaa madaxbannaani dhaqaale iyo maamul, waxaana u maamulaya Gole Degaan. Sharciga ayaa dejinaya mabaadiida guud ee saldhigga u noqonaysa hab-maamuleedka degmada, xilgudashada iyo adeegsashada awoodaha ay degmadu u madaxbannaan tahay. Tirada xubnaha golaha deegaanka degma kasta waxay ku xirnaanaysaa tirada dadka ku nool iyo baaxadeeda dhuleed.

3. Golayaasha Degaanka waxaa dooranaya muwaadiniinta degmo kasta muddo shan (5) sano ah, dibna waa loo soo dooran karaa.

4. Kala diridda Golahyaasha Degaanka iyo luminta xubinnimada Golaha Deegaanka waxaa lagu qeexi doonaa xeerka Golayaasha Deegaanka ee Puntland

Qodobka 123aad
HABRAACA GOLAHA DEGAANKA

1. Xubnaha Golaha Deegaanka fadhigooda ugu horreeya waxay ay iska dhex dooranayaan Shir-guddoomiye iyo Ku-Xigeen oo iyagu guddoominaya Golaha.

2. Xubnaha Golaha Deegaanka waxa ay iska dhex dooranayaan Duq-magaalo iyo Ku-Xigeenkiisa.

3. Duqa magaalada waa madaxa fulinta ee Dawladda Deegaanka iyo xiriiriyaha Golaha Deegaanka iyo Maamulka Gobolka.

4. Duqa magaalada wuxuu golaha hordhigayaa, si looga dodo, dabadeedna loo ogolaado, xubnaha Guddiga Joogtada ah ee Degmada oo aynan xubnihiisu ka badnaan karin saddex dalool hal dalool (1/3) ee Golaha.

5. Guddiga Joogtada ah oo uu guddoomiye u yahay Duqa magaalada, waxa ay mas'uul ka noqonayaan meelmarinta go'aannada Golaha iyo fulinta hawl-maalmeedka maamulka degmada.

Qodobka 124aad
AWOODAHA IYO XILALKA GOLAHA DEGAANKA

1. Golaha Deegaanka wuxuu mas'uul ka yahay fulinta qorsheyaasha Dawladda ee heer degmo oo ku wajahan adeegyada bulshada sida: waxbarashada Aasaasiga ah, caafimaadka, xannaanada xoolaha, beeraha, nabadgalyada, biyaha, korontada, isgaarsiinta, ilaalinta deegaanka iyo guud ahaan mashaariicda hormarineed ee heer Degmo.

2. Go'aaminta, wax ka beddelidda iyo joojinta khidmadaha laga qaado dadweynuhu ee la xiriira adeegyada uu fuliyo golaha deegaanku, iyo goynta tabarrucaadyo gaar ah oo laga rabo dadweynaha, laguna maalgeliyo mashaariicda hawlaha guud ee laga fuliyo deegaanka.

3. Oggolaanshaha iyo u baahinta dadweynaha ku talo-galka miisaaniyad-sannadeedka degmada oo ah dakhli iyo kharash isu dheellitiran.

4. Shaqaalaynta, dallacsiinta iyo ruqsaynta shaqaalaha degmada.

5. Dejinta sharci-hoosaadyo iyo awaamiir lagu fulinayo hawlaha iyo adeegyada loo qabanayo dadweynaha degmada.

6. Diyaarinta iyo go'aaminta cashuuraha degmada loona gudbiyo wasaaradda ku shaqada leh, si looga ansixiyo Golayaasha Dawladda.

7. Dejinta qorshaha horumarinta degmada, hirgelintiisana ay la kaashadaan maamulka dhexe ee Puntland.

8. Golaha Deegaanka degmo kasta wuxuu maamulaa hantida iyo dakhli kasta oo gacantooda soo gala, wuxuuna xisaab-celin tifaftiran u gudbiyaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

9. Gacan ka geysashada mashaariicda horumarineed ee ay degmada ka fulinayaan Hey'adaha Dawladda ee heer Qaran, Puntland iyo gobol.

10. Isticmaalka awoodaha iyo gudashada xilalka ay siiyaan Dastuurka iyo shuruucda kale.

Qodobka 125aad

SHURUUDAHA DOORASAHADA XUBNAHA GOLAHA DEGAANKA

1. ***Muwaaddin kasta oo Muslim ah, xilkas ah, garaadkiisu dhan yahay, Puntland ah, da'diisuna aanay ka yarayn shan iyo labaatan (25) sano waa loo dooran karaa inuu xubin ka noqdo golayaasha deegaanka ee Puntland.***

2. Waa inuu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi dhaxe ama wax u dhigma.

3. Waa inaan la laalin xuquuqdiisa muwaaddinnimo shantii (5) sano ee ugu dambeysay.

4. Qofka isu sharraxaya xubin Golaha Deegaanka waa inuu yahay muwadin reer Puntland ah, aqoonna u leh saldhigga iyo seynsaabka bulshada deegaankiisa.

QODOBKA 126aad

AWOODAHA IYO XILALKA DUQA DEGMADA

1. Duqa Degmada ayaa u sarreeya madaxda laamaha Dawladda ee Degmada, wuxuuna guddoomiyaa shirarka guddiyada horumarinta iyo nabadgelyada.

2. Wuxuu kormeeraa dhammaan shaqada Dawladda ee Degmada.

3. Wuxuu gudoomiyaa kulannada ay isugu yimaadaan guddiyada tuulooyinka.

4. Waa madaxa fulinta Dawladda Deegaanka, wuxuuna isku xiraa maamulka Degmada iyo kan Gobolka.

5. Wuxuu u xilsaaran yahay fulinta go'aanada Golaha Deegaanka iyo hawl-maalmeedka maamulka Degmada.

6. Shuruudaha lagu dooranayo Duqa Degmada waa kuwa ku xusan qodobka 120 [aad] ee Dastuurka.

Madaxa V

HANNAAANKA MAAMULKA PUNTLAND

Qaybta[aad]
SHAQAALAHA RAYIDKA

Qodobka 127[aad]
SHAQAALAHA RAYIDKA EE DAWLADDA

1. Saraakiisha Dawladda iyo shaqaalaha rayidka ahi waxay u adeegaan dadweynaha iyo Dawladda Puntland, umana daneeyaan garabyo siyaasadeed iyo koox gaar ah, waxaana ay xilkooda u gutaan si waafaqsan Dastuurka iyo sharciyada Puntland. Waa reebban tahay in xafiisyada dawladda loo isticmaalo ujeeddooyin siyaasadeed iyo dano gaar ah.

2. Saraakiisha iyo shaqaalaha Dawladda waxaa lagu qaadanayaa tartan furan oo ku saleysan aqoon, mudnaan iyo karti, loogumana kala eexan karo tixgelin la xiriirta kala raacsanaanta siyaasadaha jira, sokeeyanimo iyo xiriir saaxiibtinimo.

3. Waxaa la aqoonsanayaa taxanaha shaqo *(career)* ee shaqaalaha rayidka ee Dawladda. Sharci gaar ah ayaa lagu maamulayaa habraacyada shaqa qorista, kala astaynta jagooyinka, dallacaadaha, tababarka, ruqsayanta, xuquuqda iyo dhammaan arrimaha kale oo ku saabsan shaqaalaha Dawladda.

4. Sharciga ayaa caddaynaya shaqaalaha aan xisbiyada siyaasadda ka qaban karin mansabyo hoggaamineed.

Qodobka 128[aad]
MABAADIIDA MAAMUL-WANAAGGA

Dhammaan Saraakiisha iyo shaqaalaha dawladdu waxay xilalkooda u gudanayaan si waafaqsan mabaadiida soo socota:

(a) Waxay ku go'aan qaadanayaan si waafaqsan danaha guud oo aan ku xirnayn dan gaar ah.

(t) Waa inay ka taxadaraan xaalad saamayn khaldan ku yeelan karta xil gudashadooda, amaba shaki gelin karta hufnaantooda.

(j) Go'aannada waxaa lagu salaynayaa oo keliya mudnaanta ay leeyihiin.

(x) Qof kasta oo Sarkaal ah ama shaqaale dawladeed, waxaa lagula xisaabtamayaa natiijooyinka ka dhasha go'aannada uu ka qaato waxqabadkiisa, waana inuu fududeeyo baaritaannada hawlihiisa oo ay wadaan hay'adaha ku shaqada leh.

(k) Go'aannada la qaadanayo iyo hawlaha la fulinayo dhammaantood waa inay noqdaan kuwo aan mugdi iyo madmadow ku jirin, xogtoodana la heli karo.

(d) Sarkaal kasta waa inuu caddeeyo haddii ay jirto dan gaar ah isla markaana uu qaado tallaabooyin uu ku xallinayo arrimaha la soo gudboonaada ee go'aannadiisa saamayn ku yeelan kara.

Qodobka 129aad
MAAMULXUMIDA AMA LUNSASHADA HANTIDA UMMADDA

Sarkaal ama shaqaale kasta ee dawladeed oo si xun u maamula, lunsada lacag, hanti kale ee ummadeed ama ka qaybgala fal-dembiyeedyadaas, wuxuu geystay dembi culus, waxaana loo gudbinayaa hay'adaha Sharciga.

Qodobka 130aad
XASAANADAHA

1. ***Xasaanad waxaa leh qaar ka mid ah mas'uuliyiinta dawladda si ay uga badbaadaan eedayn la maleegey ama cadaadis sharcidarro ah iyaga oo mas'uuliyiintaasi gudanaya hawlihii ay u xilsaarnaayeen.***

2. ***Ma jirto hay'ad awood u leh inay eedayso ama xirto Madaxweynaha iyo Madaxwene ku xigeenka haddii aan la marin habraacyada sharci ee ku cad qodobka 81aad ee Dastuurka***.

3. ***Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Wakiillada lama xiri karo, lamana baari karo jirkiisa, deegaankiisa, xafiiskiisa, iyo gaadiidka uu markaas wato, lagumana oogi karo dacwado dembiyo culus laga bilaabo maalinta la doorto amaba la magacaabo ilaa uu ka dhammaysto muddada la doortay ama la magacaabay ama uu is casilo, haddii uunan Golaha Wakiilladu ka xayuubin xasaanadda. Dambiyada iyo khaldaadka aan cuslayn oo ay galaan xubnaha Golaha Wakiilladu iyo Golaha Fulinta inta ay xilka hayaan looma xiri karo loogumana yeeri karo inay maxkamadda horteeda qiraal ka baxshaan, marka laga reebo dacwadaha madaniga ah.***

4. ***Dhammaan Hawlwadeennada Golaha Wakiilladu doorto ama ogolaado magacaabidooda waxay leeyihiin xasaanad, sidaaa darteedna lama xiri karo, lamana baari karo jirkiisa, deegaankiisa, iyo gaadiidka uu markaas wato, dacwadna laguma oogi karo, haddii aan Xeer-Ilaaliyaha Guud Golaha Wakiillada weydiisan in xasaanadda laga xayuubiyo, haddii Goluhu ku qanco in uu jiro fal dalbiyeed ciqaab lagu mudan karo, waa la hakinayaa xilkiisa, waxaana la hor geynayaa maxkamadda awoodda u leh si ay xukun ku habboon uga gaarto, fal dabiyeedka lagu eedeeyey***.

5. ***Garsoore Maxkamada sare lama xiri karo, lamana baari karo jirkiisa, deegaankiisa iyo gaadiidka uu markaas wato, dacwadna laguma oogi karo haddii aan Golaha Wakiilladu ogolaan codsi uu xeer-ilaaliyaha guud ku weydiisanayo in xasaannada laga qaado, haddii Golaha Wakiilladu ku qanco in uu jiro fal dambiyeed ciqaab lagu mudan karo waa la hakinayaa xilkiisa,***

waxaana la hor geynayaa maxkamada awooda u leh si ay xukun ku habboon uga gaarto fal dambiyeedka lagu eedeeyey.

6. ***Garsoorayaasha Maxkamadaha rafcaanka iyo kuwa darajada koowaad lama xiri karo haddii aan lagu qaban, iyagoo faldenbiyeed gacanta kula jira, degaankooda iyo gaadiidkoodana lama baari karo, dacwadna laguma oogi karo, haddii aan Guddiga Sare ee Garsoorku ogolaan codsi ka yimid Xeer-Ilaaliyaha Guud oo la xiriira in xasaanadda ka qaado.***

7. ***Haddii mas'uul ka mid ah kuwa ku xusan faqradaha 2,3,4 ee qodobkan la qabto iyaga oo faldambiyeed gacanta kula jira, waxaa la wargelinayaa Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, Hoggaanka Golaha ayaana go'aan ka gaaraya meesha lagu haynayo tan iyo inta la dhammaystirayo habraaca lagu go'aaminayo in xasaanadda laga qaado iyo in kale. Haddii mas'uulka la qabto yahay garsoore waxaa loo gacangelinayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.***

8. ***Xubnaha Golaha Deegaanka lama xiri karo lamana baari karo jirkiisa, deegaankiisa iyo gaadiidka uu markaas wato, haddii aan Golaha Deegaanku ogolaan codsi xasaanad ka qaadis ah oo uu soo gudbiyey Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud ama aan lagu qaban isagoo faraha kula jira fal-dambiyeed culus.***

9. Guddoomiyayaasha Gobollada iyo ku xigeenadoodu waxay leeyihiin xasaanad xil, sidaa awgeed lama xiri karo lamana baari karo jirkooda, Degaankooda iyo gaadiidka ay markaas wataan, haddii aan Madaxweynuhu ogolaan codsi xasaanad ka qaadis oo uu soo gudbiyey Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud, ama aan lagu qaban iyagoo faraha kula jira fal dambiyeed culus.

Qodobka 131aad
DHAARTA DASTUURIGA AH

Qof kasta oo xil sare ka qabanaya Dawladda Puntland, Maxkamadda Sare ayaa u dhaarinaysa xilka loo dhiibey inta uusan xilka qaban, wuxuuna marayaa dhaartan:

"***Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay, in aan ku dhaqmo Diinta Islaamka, Dastuurka dalka Puntland iyo qawaaniintiisa dhawro, xilka la ii dhiibay daacadnimo u guto, dalka iyo dadkiisana Lillaahi ugu adeego***".

Qaybta 2aad
MAALIYADDA DAWLADDA

Qodobka132aad
HANTIDA DAWLADDA

Hantida Dawladda Puntland waxay ka kooban tahay:

(b) Dhammaan lacaagaha caddaanka ah ee Dawladda.
(t) deymaha taagan oo laga qabo Dawladda.

(j) ***hantida guurtada,ma guurtada iyo badeecadaha Dawladda ee ku saleysan qaab sharci ah.***
(x) xuquuqaha ay Dawladdu ku heli karto hirgalinta shuruucda canshuuraha iyo deeq kasta oo uu sharcigu jideynayo.
(kh) Maaliyadda Dawladda waxaa laga qaameyn karaa deyman dawladdu aqoonsan tahay iyo kharashyada Dawladda oo si sharci ah loo jideeyay.

(d) hadiyadaha la siiyo Madaxdda dawladda ee leh muuqaal qaran.

Qodobka 133aad
MAS'UULIYADDA DARYEELKA HANTIDA IYO MAALIYADDA DAWLADDA

1. Dhammaan dadweynaha Puntland waxaa waajib ku ah daryeelka iyo dhawridda hantida Dawladda.

2. Saraakiisha iyo shaqaalaha Dawladda waxaa waajib gaar ahi ka saaran yahay xannaanaynta hantida Dawladda oo ay mas'uul ka yihiin si ay ugu gutaan waajibkooda shaqo.

3. Madaxda maamulka hay'ad kasta ee Dawladeed ee heer Puntland, gobol iyo degmo ayay saaran tahay mas'uuliyadda sharci ee ***diiwaan gelinta*** iyo dhaqangelinta waajibaadka ku xusan faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan***.***

4. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo Hantidhawraha Guud ayaa sharciyan mas'uul ka ah dhaqangalinta waajibaadkan.

5. Qaybta fulinta ee Dawladda Puntland oo u sii mareysa Wasiirka Maaliyadda ayaa mas'uul ka ah maaraynta Maaliyadda Dawladda.

Qodobka 134aad
MIISAANIYADDA DAWLADDA

1. Miisaaniyadda Dawladdu waa sharci qeexaya dhammaan dakhliga Dawladdu fileyso in ay hesho sanad-maaliyadeedka iyo dhammaan kharashyada ay damacsan tahay in ay gasho si ay u gaarto himilooyinkeeda.

2. Sannad-Maaliyadeedka Puntland wuxuu bilawdaa 1da bisha Jannaayo, wuxuuna dhammaadaa 31ka Disembar ee isla sannadkaas.

3. Wakaaladaha madaxbannaan ee Dawladda iyo hay'ad kasta oo gebi ahaan ama qayb ahaan lagu maalgeliyo hanti Dawladeed waxay yeelanayaan miisaaniyad u gaar ah oo ku lammaan miisaanniyadda guud ee Puntland, waxaana meelmarinaya Golaha Wakiillada.

4. Sharci gaar ah ayaa tilmaamaya dhammaan arrimaha la xiriira diyaarinta, oggolaanshaha, dhaqangelinta iyo warbixinta natiijada miisaaniyadda.

5. Haddii aan Golaha Wakilladu ogolaan Miisaaniyadda cusub ee Dawladda sanadka bilowgiisa, sabab kasta ha ku timaadee***, waxaa lagu sii dhaqmayaa miisaaniyadda sannadkii hore muddo bil ah.***

Qodobka 135aad

HABRAACA MIISAANIYADDA

1. Ku-talagalka Miisaaniyadda Dawladda, waxaa soo abaabula Wasiirka Maaliyadda isaga oo ku salaynaya oddoroska Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda iyo xogta ay ururiyeen, iskuna dubbarideen khubarada Maaliyadda iyo shaqaalaha kale ee Waaxda Miisaaniyadda ee isla Wasaaradda, waana in loo gudbiyaa Golaha Wasiirada ugu dambeyn 10ka Oktoobar.

2. Miisaaniyadda golaha wasiiraddu ogolaaday waa in la horgeeyaa Golaha Wakiillada si ay ogolaadaan, wax uga bedelaan ama u diidaan.

Qodobka 136aad

XISAAB-XIRKA SANNAD-MAALIYADEEDKA

1. Xisaab-xirka sannad maaliyadeed kasta waa in Wasaaradda Maaliyaddu hor geyso Golaha Wakiillada ugu dambeyn 30-ka Juun, ee sanadka xiga si uu uga doodo kadibna u ansixiyo ama diido.

2. Haddii Golaha Wakiilladu diido xisaab-xirka sannad maaliyadeedka, waxaa waajib noqonaysa inuu Goluhu u gudbiyo Xafiiska xeer-ilaaliyaha guud isagoo raacinaya sababihii lagu diiday, si uu baaris sharci ah u sameeyo, ciddii mas'uuliyad ciqaabeed yeelatana sharciga u hor geeyo.

Madaxa VI

SARRAYNTA IYO DIB-U-HABEYNTA DASTUURKA
IYO
KU DHAQAN KUMEELGAAR AH

Qodobka 137aad

DOORKA SHARCI EE DASTUURKA

1. Dastuurka Puntland waa sharciga ugu sarreeya Puntland, marka laga reebo shareecada Islaamka.

2. Xeer, xeer hoosaad iyo wareegto kasta ee fulineed oo ka soo horjeedda Dastuurka Puntland waa waxba kama jiraan***.***

Qodobka 138aad

WAX KA BEDDELIDDA DASTUURKA

1. Hindisaha wax ka beddelidda Dastuurka waxaa soo jeedin kara:

(b) Shan meelood oo meel (1/5) Xubnaha Golaha Wakiillada.

(t) Golaha Xukuumadda.

(j) Ugu yaraan shan kun (5000) oo muwaadiniin codbixiyayaal ah.

2. Markii soo jeedinta ay soo gaarto Golaha Wakiillada, waxaa falanqeynaya guddi gaar ah. Guddigu wuxuu soo jeedinayaa talobixin uu Goluhu ka doodayo, dabadeedna uu ku ansaxiyo hal dheeri.

3. Golaha Wakiillada wuxuu sameynayaa olole wargalin oo ku saabsan dib-u-habeynta, si loo xaqiijiyo in dadweynaha oo dhan ay xog-ogaal ugu noqdaan isbadalka lagu sameyanayo Dastuurka.

4. Muddo aan bil ka yareyn kadib Goluhu wuxuu u soo bandhigayaa soo jeedinta in lagu ogolaado ***ama loogu diido*** tiro dhan saddex meelood labo (2/3).

5. Qodobada 1aad, 2aad, 3aad, ***8aad iyo 12aad*** ee Madaxa I, qaybtiisa 1aad ee Dastuurka, waxaa wax lagaga badali karaa afti dadweyne oo keliya.

6. Wax ka beddelidda Dastuurka waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah loomana cuskan karo diidmada qayaxan ee Madaxweynaha.

Qodobka 139aad

ISWAAFAJINTA DASTUURKA PUNTLAND IYO DASTUURKA JAMHUURIYADDA FEDARAALKA EE SOOMAALIYA

1. Marka dadweynaha Soomaaliyeed afti ku meelmariyo Dastuurka Jamhuuriyadda federalka Soomaaliya, ayaa Golaha Wakiillada ee Puntland wuxuu magacaabayaa guddi gaar ah oo ka kooban xubno ka tirsan Golaha Wakiillada iyo xubno isugu jira Aqoonyahanno sharci iyo Garsoorayaal ay xukuumaddu soo jeediso, si ay dib u eegid ugu sameeyaan dastuurka puntland una hubsadaan arimaha ay ku kala gadisan yihiin labada Dastuur, inta aynan ogolaan Dastuurka Fedaraalka. Guddiga gaarka ah ee dib u eegidda Dasturka Puntland wuxuu Dastuurka Puntland waafajinayaa kan Federaalka, ***iyadoo mid waliba mudnaantiisa*** leeyahay.

2. Guddiga gaarka ah ee dib u eegidda Dastuurka Puntland, wuxuu la tashanayaa Golaha Fulinta, Maxkamadda dastuuriga, Xeer-Ilaaliyaha Guud, mas'uul kasta ama qof kasta oo uu u arko inuu tala ku biirinayo inta lagu guda jiro isku dubbaridida talooyinka wax ka beddelidda Dastuurka Puntland.

3. Guddiga Gaarka ah ee dib u eegista Dastuurka Puntland hindisaha is waafajinta labada dastuur wuxuu u bandhigayaa Golaha Wakiillada, si uu uga doodo uguna oggolaado cod aqlabiyad hal-dheeri ah (1/2+1).

4. Hoggaanka Golaha wakiilladu wuxuu si degdeg ah ugu gudbinayaa Madaxweynaha isbeddellada Dastuurka Puntland lagu sameeyay si uu u saxiixo faafinta rasmiga ahna loogu soo saaro.

5. Waxaa reebban in guddiga gaarka ah loo adeegsado wax ka beddelidda Dastuurka ee ka baxsan iswaafajinta Dastuurka federaalka iyo kan Puntland.

Qodobka 140aad
DHAQANGALKA DASTUURKA

1. ***Dastuurkani wuxuu si rasmi ah u dhaqan-gelayaa marka lagu ogolaado afti dadweyne .***

2. ***Inta Aftida ka horeysa wuxuu Dastuurkani sii ahaanaya mid sharci ahaan lagu sii dhaqmo, laga bilaabo marka uu Golaha Wakillada ee Puntland ansixiyo, isagoo bedelaya kii ka horeeyay ee ku meel gaarka ahaa.***

Lifaaq 1

MAR XALADDA KALA GUURKA

1. Guddiga Doorashada Puntland ee ugu horreeya waa ku meel gaar, waxaa laga dhex dooranayaa Dadwaynaha wuxuuna ka koobnaanayaa (9) sagaal xubnood. (5) shan uu Madaxweynuhu magacaabo, Golaha Wakiilladuna ansixiyo iyo afar (4) Golaha Wakiilladu soo sharraxo ka dibna ansaxiyo.

2. Guddigu wuxuu u xilsaaran yahay qabashada Aftida Dastuurka iyo doorashooyinka Golayaasha Degaanka ee ugu horreeya, xilkiisuna wuxuu ku eg yahay ku dhawaaqidda natiijooyinka doorashooyinka Golayaasha Degaanka iyo sharciyeynta xisbiyada siyaasadda.

3. Inta lagu jiro muddada xilhayntiisa Guddigu wuxuu leeyahay awoodaha ku cad Qodobka ***114*** ee Dastuurka Puntland.

4. Marka ay dhammaato muddada xilhaynta Guddiga Koowaad waxaa la dooranayaa Guddiga Doorashada Puntland ee rasmiga ah, si waafaqsan Madaxa IV, Qaybta 5aad, Xubinta 3aad ee Dastuurka Puntland.

5. ***Golayaasha Deegaanka oo doorashadoodu ku beeganto furitaanka axsaabta ka hor waa la soo gaabin karaa ama la kordhin karaa muddada xilkooda.***

6. ***Haddii Dastuurka lagu diido afti dadweyne waxaa lagu sii dhaqmayaa si ku meel gaar ah Dastuurka la diiday inta laga dhamaystirayo Dastuur kale oo afti dadweyne lagu ogolaaday.***

TUSMADA DASTUURKA

Madaxa 1	Mabaadi'da Aasaasiga ah Ee Puntland …….....	1
Qeybta 1-aad	Astaamaha Aasaasiga ah …….	1
Qodobka 1-aad	Magaca iyo Himilada……	1
Qodobka 2-aad	Sarreynta Sharciga……	1
Qodobka 3-aad	Mabaadi'da Aasaasiga ah …….	1
Qodobka 4-aad	Hannaanka Xukunka …….	2
Qodobka 5-aad	Dadka ……	2
Qodobka 6-aad	Tirakoobka…….	3
Qodobka 7-aad	Dhulka iyo soohdimaha…….	3
Qodobka 8-aad	Afka……...	3
Qodobka 9-aad	Diinta …….	3
Qodobka 10-aad	Magaalo Madaxda…….	3

Qodobka 11-aad	Calanka, Astaanta iyo Heesta Calanka……	4
Madaxa II	Xuquuqda Aasaasiga ah iyo Damaanad qaadka Qofka ..	4
Qeybta 1-aad	Xuquuqda shakhsiga iyo laalideeda……	4
Xubinta Koowaad	Xuquuqda shakhsiga ……4	
Qodobka 12-aad	Sinnaanta Dadka……4	
Qodobka 13-aad	Xorriyada caqiidada…….	4
Qodobka 14-aad	Xorriyada fikirka……..	4
Qodobka 15-aad	Aasaasidda iyo ka mid noqoshada Ururada Bulshada…..	5
Qodobka 16-aad	Xorriyada dhaqdhaqaaqa…….	5
Qodobka 17-aad	Lahaanshaha hantiyeed……	5
Qodobka 18-aad	Nolosha qofka iyo nabadgelyeynta jirkiisa……	5
Qodobka 19-aad	Madaxbannaanida qofka ……	6
Qodobka 20-aad	Magangelinta siyaasadeed iyo isucelinta Eedaysanayaasha/ dembiilayaasha ……	6
Qodobka 21-aad	Ammaanka hoyga……	6
Qodobka 22-aad	Xaqa saxaafadda …….	6
Qodobka 23-aad	Xorriyadda is-gaarsiinta…….	7
Qodobka 24-aad	Bannaanbaxyada……	7
Qodobka 25-aad	Xaqa dacwada iyo is-difaaca…….	7
Qodobka 26-aad	Dembiga iyo ciqaabta……	7
Qodobka 27-aad	Xuquuqda eedaysanaha……	7
Qodobka 28-aad	Xuquuqda qofka xukuman……..	8
Xubinta Labaad	Laalidda xorriyadaha madaniga ah……	8
Qodobka 29-aad	Xaaladda dedegga ah……	8
Qaybta 2-aad	Xuquuqda bulshada…….	9
Xubinta Koowaad	Qoyska……... 9	
Qodobka 30-aad	Xuquuqda qoyska……	9
Qodobka 31-aad	Xuquuqda carruurta……	9
Qodobka 32-aad	Waxbarashada……..	9
Qodobka 33-aad	Caafimaadka ……. 10	
Qodobka 34-aad	Agoomaha, curyaamada, garaad-dhimanka Iyo dadka gaboobay……	10
Qodobka 35-aad	Xuquuqda haweenka…….	11
Qodobka 36-aad	Xuquuqda dhalinyarada iyo horumarinta isboortiga…….	11
Qodobka 37-aad	Xuquuqda shaqaalaha ……..	11
Qodobka 38-aad	Badbaadada shaqaalaha ……..	12
Qaybta 3-aad	Muwaadiniinta iyo habraaca Doorashooyinka……..	12
Qodobka 39-aad	Muwaadinimada……	12
Qodobka 40-aad	Waajibaadka muwaadinka……. 12	
Qodobka 41-aad	Xuquuqda muwaadinka ……..13	
Qodobka 42-aad	Xaqa bandhigida cabashada……..	13
Qodobka 43-aad	Hakinta xuquuqda siyaasadeed iyo xil qabasho ee muwaadinka ……... 13	
Qodobka 44-aad	Doorashooyinka……..13	
Qodobka 45-aad	Dadka aan is-sharixi Karin……	14
Qodobka 46-aad	Xisbiyada siyaasadeed……14	
Qodobka 47-aad	Shuruudaha furashada xisbi siyaasadeed……15	
Madaxa III	Dhaqaalaha ……15	
Qodobka 48-aad	Hannaanka dhaqaalaha ……...15	
Qodobka 49-aad	Dhaqaalaha suuqa xorta ah ……16	

Qodobka 50-aad	kaalinta dhaqaalaha ee dawladda……	16
Qodobka 51-aad	Shirkadaha wadaagga ah……	16
Qodobka 52-aad	Gaddida hantida umadda……	16
Qodobka 53-aad	Qaramaynta hantida gaar ahaaneed ……	17
Qodobka 54-aad	Khayraadka dabiiciga ah……	17
Qodobka 55-aad	Ilaalinta deegaanka……	17
Madaxa IV	Qaab-dhismeedka dawladda……	18
Qaybta 1-aad	Hay'adaha aasaasiga ah ee dawladda……	18
Qodobka 56-aad	Hannaanka dawladda……	18
Qodobka 57-aad	Qaybaha dawladda……	18
Qodobka 58-aad	kala soocnaanta qaybaha dawladda……	18
Qodobka 59-aad	Wada-shaqeynta qaybaha dawladda……	18
Qaybta 2-aad	Xeer dejinta……	19
Xubinta Koowaad	Golaha Wakiillada ,……	19
Qodobka 60-aad	Golaha Wakiillada……	19
Qodobka 61-aad	Shuruudaha lagaga mid noqon karo G/wakiillada……	19
Qodobka 62-aad	Sababaha lagu lumin karo xubinnimada G/wakiillada……	19
Qodobka 63-aad	Habraaca Golaha Wakiillada ……	20
Qodobka 64-aad	Awoodaha Golaha Wakiillada ……	20
Qodobka 65-aad	Kalfadhiyada Golaha Wakiillada ……	22
Qodobka 66-aad	Kala diridda Golaha Wakiillada ……	22
Qodobka 67-aad	Kalsooni kala noqoshada Wasiiradda……	22
Xubinta 2-aad	Habka samaynta sharciga……	23
Qodobka 68-aad	Curinta Sharciyada……	23
Qodobka 69-aad	Nidaamka hal abuurka muwaadiniinta……	23
Qodobka 70-aad	Dooda Golaha ee mashaariicda sharciyada……	23
Qodobka 71-aad	Saxiixa madaxweynaha iyo faafinta ……	24
Qodobka 72-aad	Diidmada qayaxan ee Madaxweynaha……	24
Qodobka 73-aad	Jebinta diidmada qayaxan……	24
Qaybta 3-aad	Fulinta ……	24
Qodobka 74-aad	Hey'adda fulinta ……	24
Qodobka 75-aad	Golaha Xukuumada……	25
Qodobka 76-aad	Awoodaha iyo mas'uuliyadaha G/xukuumada……	25
Qodobka 77-aad	Habraaca Golaha Fulinta……	25
Qodobka 78-aad	Shuruudaha Doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka ……	26
Qodobka 79-aad	Mudada xilka ……	26
Qodobka 80-aad	Awoodaha iyo mas'uuliyadaha madaxweynaha ……	27
Qodobka 81-aad	Awoodaha iyo mas'uuliyahada madaxweyne ku xigeenka…	28
Qodobka 82-aad	Eedaynta iyo xil ka qaadista madaxweynaha iyo Madaxwene ku xigeenka ……	29
Qodobka 83-aad	Xilalka wasiirka ……	29
Qodobka 84-aad	Xilalka wasiir ku xigeenka……	29
Qodobka 85-aad	Wakaaladaha gaarka ah……	30
Qodobka 86-aad	Ciidamada nabadgelyada ……	30
Qaybta 4-aad	Garsoorka ……	30
Xubinta Koowaad	Nidaamka garsoorka……	30
Qodobka 87-aad	Qaab-dhismeedka iyo mabaadi'da……	30
Qodobka 88-aad	Guddiga sare ee Maamulka garsoorka……	31
Qodobka 89-aad	Awoodaha iyo xilalka Golaha garsoorka……	32

Xubinta labaad	Maxkamadaha ……	32
Qodobka 90-aad	Maxkamada sare ……	32
Qodobka 91-aad	Doorashada garsoore maxkadama sare ……	33
Qodobka 92-aad	Nidaamka Go'aan qaadashada maxkamada sare……	33
Qodobka 93-aad	Awoodaha iyo xilalka maxkamada sare……	34
Qodobka 94-aad	Maxkamadaha racfaanka……	34
Qodobka 95-aad	Maxkamada derajada koowaad……	35
Qodobka 96-aad	maxkamadaha ciidamada ……	35
Qodobka 97-aad	Maxkamada dastuuriga ah……	35
Qodobka 98-aad	Awoodaha iyo xilalka maxkamada dastuuriga ah …….	36
Qodobka 99-aad	Go'aan qaadashada maxkamada dastuuriga ah……	36
Qodobka 100-aad	Shuruudaha xulidda garsoorayaasha maxkamada dastuuriga……	37
Qodobka 101-aad	Luminta Xubinnimada maxkamada dastuuriga ah……..	37
Qaybta 5-aad	Hey'adaha kale ee dawladda ee muhiimka ah…….	37
Xubinta Koowaad	Xeer-ilaalinta guud…….	37
Qodobka 102-aad	Xeer-ilaaliyaha guud ……	37
Qodobka 103-aad	Shuruudaha iyo magacaabida xeer-ilaaliyaha guud…….	38
Qodobka 104-aad	Awoodaha iyo xilalka xeer-ilaaliyaha guud……..	38
Qodobka 105-aad	Xil ka qaadista xeer-ilaaliyaha guud……..	38
Xubinta labaad	hanti-dhowrka guud……..	39
Qodobka 106-aad	Xafiiska hanti-dhowrka guud……..	39
Qodobka 107-aad	Awoodaha iyo xilalka hanti-dhowrka guud……	39
Qodobka 108-aad	Xafiiska garyqaanka guud…….	40
Qodobka 109-aad	Bangiga dhexe……	41
Qodobka 110-aad	Aqoonsiga xeer dhaqameedka……..	41
Qodobka 111-aad	Guddiga culimada diinta……...	42
Xubinta Saddexaad	Hey'adda doorashada ……	43
Qodobka 112-aad	Guddiga Doorashada…….	43
Qodobka 113-aad	Nidaamka doorashada guddiga……	43
Qodobka 114-aad	Awoodaha iyo xilalka guddiga doorashada ……	43
Qodobka 115-aad	Wada shaqeynta guddiga doorashada iyo xisbiyada siyaasadeed ……..	44
Xubinta Afraad	Difaaca xuquuqda aadanaha……..	45
Qodobka 116-aad	Xafiiska difaaca iyo taaba gelinta xuquqda aadanaha ,…	45
Qodobka 117-aad	magacaabida difaacaha ……	45
Qodobka 118-aad	Awoodaha iyo xilalka difaacaha xuquuqda aadanaha…..	45
Qodobka 119-aad	Xil ka qaadista difaacaha xuquuqda aadanaha ……	46
Qaybta 6-aad	Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka …….	46
Xubinta Koowaad	Baahinta Maamulka …….	46
Qodobka 120-aad	Baahinta Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka …….	46
Xubinta Labaad	Maamulka Gobollada …….	47
Qodobka 121-aad	Awoodaha iyo xilalka Guddoomiyaha Gobolka…….	47
Qodobka 122-aad	Shuruudaha magacaabista guddoomiye gobolka iyo Guddoomiye ku xigeennada …….	47
Xubinta Saddexaad	Maamulka Degmooyinka ,…….	48
Qodobka 123-aad	Golayaasha deegaanka……..	48
Qodobka 124-aad	Habraaca golaha deegaanka…….	48
Qodobka 125-aad	Awoodaha iyo xilalka golaha deegaanka……	48
Qodobka 126-aad	Shuruudaha doorashada xubnaha golaha deegaanka….	49

Qodobka 127-aad	Awoodaha iyo xilalka duqa degmada…….	50
Madaxa V	Hannaanka maamulka Puntland ……	50
Qaybta 1-aad	Shaqaalaha rayidka ah……	50
Qodobka 128-aad	Shaqaalaha rayidka ah ee dawladda……..	50
Qodobka 129-aad	Mabaadi'da maamul wanaagga …….	51
Qodobka 130-aad	maamul xumida ama lunsashada hantida ummadda……..……	51
Qodobka 131-aad	Xasaanaddaha……..	51
Qodobka 132-aad	Dhaarta dastuuriga ah…….	52
Qaybta 2-aad	Maaliyadda dawladda……	53
Qodobka 133-aad	Hantida dawladda……	53
Qodobka 134-aad	Mas'uuliyadda daryeelka hantida iyo maaliyadda Dawladda……	53
Qodobka 135-aad	Miisaaniyadda dawladda……	54
Qodobka 136-aad	Habraaca miisaaniyadda……	54
Qodobka 137-aad	Xisaab xirka sanad maaliyadeedka ……	54
Madaxa VI	Sarreynta iyo dib u habaynta dastuurka iyo ku dhaqan ku meel gaar ah……	55
Qodobka 138-aad	Doorka sharci ee dastuurka ……	55
Qodobka 139-aad	Wax ka bedelidda dastuurka ……	55
Qodobka 140-aad	Is-waafajinta dastuurka Puntland iyo dastuurka Jamhuuriyada federaalka ee Soomaaliya…….	56
Qodobka 141-aad	Dhaqan galka dastuurka …….	56
Lifaaqa I	Marxaladda kala guurka…….	57